**JAMHUURIYADDA SOMALILAND** | **REPUBLIC OF SOMALILAND**

**XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA**
**SOLICITOR GENERAL OFFICE**

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE

## ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند



| | | |
|---|---|---|
| *Sannadka 5aad* | *Cadad Gaar ah* | 04/02/2017 |



## XEERKA MAAMULKA IYO MAALIYADDA QARANKA
## XEER Lr. 75/2016


Email: garyaqaankaguud@gmail.com
Web.www.garyaqaankaguud.com


*Lama iibin karo*
*Not for sale*

*Sannadka 2016*

# REPUBLIC OF SOMALILAND

## THE PRESIDENT

**JSL/M/XERM/249-4524/012017** **DATE….31/01/17**

# XEER MADAXWEYNE Lr: 0758/012017

## Dhaqan-galka Xeerka Maamulka iyo Maaliyadda Qaranka Xeer Lr. 75/2016

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland; |
| Markuu Arkay: | Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland; |
| Markuu Arkay: | Go'aanka Golaha Wakiilada, Go'aan Lr. GW/KF-32/714/2017 ee ku taariikhaysan 24/01/2017, ee ay ku ansixiyeen Xeerka Maamulka iyo Maaliyadda Qaranka Xeer Lr.75/2016; |

**Wuxuu Soo Saaray**

Dhaqan-galka Xeerka Maamulka iyo Maaliyadda Qaranka Xeer Lr.75/2016.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

The Republic of Somaliland
House of Representatives
Head Quarter Hargeisa.

Jamhuuriyadda Somaliland
Golaha wakiilada
Xarunta Hargeisa

Ref GW/KF-32/714/2017 Date: 24/01/2017

**Ujeedo:- Go'aanka ansixinta Xeerka Maamulka Maaliyada Qaranka ee JSL (Xeer Lr.75/2016)**

**GOLAHA WAKIILADA JSL**

| | |
|---|---|
| **Markuu arkay:-** | Qodobka 53aad 54aad, 55aad, 74aad, 77aad, 78aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland. |
| **Markuu Aqoonsaday:-** | Waajibaadka Dastuuriga ah ee kasaaran Golaha wakiilada jaangoynta maaliyada, ansixinta Miisaaniyadeed sanadeedka dawlada, ogolaanshaha galida kharashaadka iyo dhamaan arimaha la xidhiidha Maaliyadaha. |
| **Markuu arkay:-** | Baahida loo qabo xeer lagu dhaqo habsami u maamulida hanaanka miisaaniyadda Qaranka iyo dajinta habraacyo keenaya diyaarinta iyo meelmarinta miisaaniyadda dawladda oo Golaha Wakiiladu masuul ka yahey wax ka badalkeeda, qoondeynteeda iyo ansixinteeda Sanad kasta. |
| **Markuu xaqiiqsaday:-** | In aanu jirin xeer ku filan oo lagu dhaqo Siyaasada Maaliyada dalka iyo hanaanka loo diyaarinayo miisaaniyada ee loogusoo gudbinayo Golaha Wakiilada si waafaqsan Dastuurka iyo shuruucda kale ee dalka. |
| **Markuu Ogaaday:-** | In loo baahan yahey in dhaqaalaha iyo maaliyada dalku noqoto mid hufan oo waajibaadkoodii dastuur iyo xeerba ay ka gutaan laamaha ku shaqada leh sida Xisaabaadka Guud ee dawlada, Hanti-dhawrka, Wasaarada Maaliyada iyo Golaha Wakiilada |
| **Markuu tixgaliyay:-** | Doodii iyo afkaartii mudanayashu ka dhiibtey Mashruuc-sharcigan lagu maamulayo Maaliyada iyo Miisaaniyada sanadeedka dawladu ku shaqayso. |

**Markuu u Codeeyay:-** Ansixinta Xeerka Maamulka Maaliyada Qaranka ee JSl Kal-fadhigii **32aad** fadhigiisi **9aad** taariikhduna aheyd **13/12/2016** oo ay goob joog ahaayeen **(44)** Mudane oo ka mida ah mudanayaasha Golaha Wakiilada.

## WUXUU

Cod aqlabiyad ah **(34)** oo gacan taag ah ku ogolaaday Xeerka Maamulka Maaliyada Qaranka (**Xeer Lr.75/2016**) halka **lix (6)** mudane ka diideen, hal **(1)** mudanena ka aamusay, Guddoomiyuhuna muu codayn sida caadada ah.

**Allaa Mahad Leh**

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada

Baashe Maxamed Faarax
K/G Gudoomiyaha Golaha Wakiilada

## Jamhuuriyadda Somaliland

### GOLAHA WAKIILADU.

**Markuu Arkay: -** Qodobka 53aad 54aad, 55aad, 74aad, 77aad, 78aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland.

**Markuu Aqoonsaday: -** waajibaadka Dastuuriga ah ee kasaaran Golaha wakiilada Jaangoynta maaliyada, ansixinta Miisaaniyad sanadeedka dawlada, ogolaanshaha galida kharashaadka dhamaan arimaha la xidhiidha Maaliyada.

**Markuu Arkay:** - Baahida loo qabo xeer lagu dhaqo habsami u maamulida hanaanka miisaaniyadda Qaranka iyo dejinta habraacyo lagu hago diyaarinta iyo meel marinta miisaaniyada dawladda oo Golaha Wakiiladu masuul ka yahay wax ka bedelkeeda, qoondeynteeda iyo ansixinteeda sanadkasta.

**Markuu Xaqiiqsaday:** - In aanu jirin xeerar ku filan oo lagu maamulo siyaasada maaliyada dalka iyo hanaanka loo diyaarinayo miisaaniyada, isla markaana loogu soo gudbinayo Golaha Wakiilada, si waafaqsan Dastuurka iyo shuruucda kale ee dalka.

**Markkuu Ogaaday:** - Muhiimada ay leedahay in dhaqaalaha iyo maaliyada dalka laga dhigo mid hufan, kaas oo waajibaadkooda Datuur iyo sharciyeedba ay ka gutaan laamaha ku shaqada leh sida Xisaabaadka Guud ee dawlada, Hanti-dhowraha Guud, Wasaarada Maaliayada iyo Golaha Wakiilada

**Markuu Tixgeliyay:** - Doodihii, iyo afkaartii ay mudanayaasha Golaha Wakiiladu ku dhiibteen Mashruucan-sharci ee lagu maamulayo Maaliyada iyo Miisaaniyadsanadeedka dawladu ku shaqayso.

**WUXUU ANSIXIYAY**

## XEERKA MAAMULKA IYO MAALIYADA QARANKA
## Xeer Lr. 75/2016

## QAYBTA I AAD
## <u>Hordhac</u>

1. Xeerkan waxa loogu yeedhayaa "**Xeerka Maamulka Maaliyada Qaranka" (Xeer Lr: 75/2016).**

2. **Xeerkan waxaa looga gol-leeyahay;** in la sameeyo nidaam cad oo lagu maamulo Maaliyada Dawladda si loo hubiyo isla xisaabtan dhamaystiran, isla markaana loo sharciyeeyo qaabka ugu haboon ee diyaarinta iyo isticmaalka Miisaaniyada Qaranka iyo.

3. In Xeerkan lagu aasaaso Khasnada Guud ee Kaydka Qaranka, isla markaana loo nidaamiyo habka isku wareejinta Xisaabaadka iyo Deymaha *(Amaahda dawladu gasho).*

4. Xeerkani wuxuu dhaqan geli doonaa taariikhda uu u asteeyo *(Xaddido)* Wasiirku isaga oo ku soo saaraya sharci-hoosaad. Taariikho kala duwan ayaa loo astayn karaa ama loo xaddidi karaa, iyadoo tixgelin gaara la kala siinayo qodobada kala duwan ee Xeerkan. Marka loo eego Xeerkan, Haddii aanu nuxurku si kale u dhignayn waxaa lagama maarmaan ah in ereyada soo socda macnahan loo adeegsado:-

   i. **"Xisaabiyaha Guud**": Waxaa loola jeedaa qofka loo magacaabo inuu noqdo Xisaabiye Guud marka loo eego sida ku cad Qodobka 20aad ee Xeerkan iyo sida uu dhigayo Qodobka 90aad, farqada 3aad ee Dastuurka JSL.

ii. “**Guddi Hanti-dhawr”:** Waa guddi hesha warbixinta hanta-dhawrka, dib u Eegta, isla markaana dabagal ku samaysa, si ay u xaqiijiso in sarkaalka Xisaabaadka ee Ha’yada Dawlada ay khusayso, uu wax ka qabtay arrimaha hanti-dhawrka ee ku xusan warbixinta hanta-dhawrka.

iii. “**Xeerka Qoondada”:** Waxaa loola jeedaa Xeer kasta oo lagu dalbanaayo qadar lacag ah oo laga saarayo Kayda Dakhliga Guud si loogu kabo adeega Sannad maaliyadeedka.

iv. “**Hanti-dhawraha Guud”:** Waxaa loola jeedaa qofka loo magacaabay ama loo tixgelinayo in loo magacaabay Hanti-dhawre Guud sida ku cad Qodobka 90aad (3) iyo 114aad (1) ee Dastuurka JSl.

v. **“Sendooyinka Khasnada Dawladda”** (T-**bills**): Waxaa loola jeedaa sendooyinka qasnadda dawladda oo lagu soo saaray sida ku cad Qodobka 24aad, isla markaana waafaqsan jadwalka labaad ee Xeerkan.

vi. “**SEND” (bond):** Waxaa loola jeedaa sendada lagu soo saaray sida ku cad Qodobka 57aad iyo si waafaqsan jadwalka koobaad ee xeerkan;

vii. **“Miisaaniyad”:** Waxaa loola jeedaa hanaanka ay Dawladdu u dejiso heerarka ilaha maaliyadeed si ay u ururrsato isla markaana si midho-dhal ah ugu qoondayso kharash-garaynta khayraadka

maaliyada ee dhamaan qaybaha dawlada si loo gaadho hadafyada Qaranka.

viii. “**Xoghayaha Sare ee Fulinta”:** Waxaa loola jeedaa qofka leh masuuliyada lagu maaraynayo arimaha hay’ad dawladeed;

ix. **“Balanqaad-Waajibadeed”**: Waa qandaraas ama Go’aan sharci oo Dawlada ku keeni kara Kharashaad.

x. “**Lacag cayiman”:** waa qadar u dhigma laba boqol iyo konton dollarka Maraykanka ah.

xi. “**Qoondayn-Kharash”:** Waxaa loola jeedaa odorosyo ku jira qoondada lagu sameeyay Xeerka Qoondada (appropriation law) ama xeer qoondo oo kaabis ah;

xii. **“Sannad-Maaliyadeed”:** Waxaa loola jeedaa muddo laba iyo toban bilood ah oo ku dhamaanaysa 31ka Diisambar;

xiii. **“Kaydka Dakhliga Guud”:** Waxaa loola jeedaa Kayda Dakhli Guud ee Soomaaliland ee lagu aasaasay Qodobka 54aad (2) ee Dastuurka JSL.

xiv. “**Dawlad”:** Waxaa loola jeedaa dawladda Jamhuuriyadda Soomaaliland;

xv. **“Hay’ad Dawladeed”:** Waxaa loola jeedaa Wasaarad, Waax, Wakaalad Qaran ama hay’ad kasta oo kale oo dawladda ka tirsan.

xvi. **"Hantidhawridda Gudaha":** Waxaa loola jeedaa habka lagu cabiro, qiimeeyo, laguna warbixiyo maamulka hay'adeed ee la xidhiidha hufnaanta nidaamka dabrida gudaha (hubinta gudaha) ee loo adeegsado in lagu hubsado ansaxnimada Maaliyadda iyo warbixinaha kale;

~~xvii.~~ **"Illaalinta gudaha":** Waxaa loola jeedaa nidaamyo isku xidhan oo lagu hubinayo in xogta dhaqaale iyo xogaha kaleba ay yihiin qaar laysku halayn karo oo dhamaystiran iyo in la xaqiijiyo u hogaansanaanta siyaasadaha maamulka ee hay'ada, meelmarinta wax ku oolka ah, nidaamsan ee hay'ada iyo xogsamaynta saxda ah, ilaalinta hantida iyo khayraadka.

xviii. **"Mabaa'diida caalamiga ah ee ku haboon Baadhista":** Waxay ka dhigantahay Mabaa'diida baadhista hantida iyo hubinta ee ay soo saartay Hay'ada Caalamiga ah ee Hay'adaha ugu Sareeya Hanti-dhawrka (INTOSAI) ama Guddida Caalamiga ah ee qaabilsan Xeerarka Baadhista iyo Hubinta Hantida ee hoos tagta Xidhiidhka Caalamiga ah ee Xisaabaadka

xix. **"Dayn":** Waxaa loola jeedaa Amaah kasta oo ay dawladu qaadato;

xx. **"Maamulka Dawladdaha Hoose":** Waxaa loola jeedaa Degmada ama Golaha Deegaanka lagu sheegay Qodobka 109aad ee Dastuurka JSL;

**xxi.** **“Wasiir”:** Waxaa loola jeedaa Wasiirka ka masuulka ah Maaliyadda;

**xxii.** **“Wax-Soo-Saar”:** Waxaa loola jeedaa badeecadda lasoo saaro iyo adeegyada la bixiyo;

**xxiii.** **Hufnaan”:** Waxaa loola jeedaa shuruudaha u dagsan in ay yeeshaan kharash iyo risiidhada ay tahay in lala macaamilo iyada oo la raacayo ujeedooyinka Golaha Wakiilada, gaar ahaana, kuwa lagu sheegay gudida dhaqaalaha;

**xxiv.** **“Maaliyadda Dawladda”:** Waxaa loola jeedaa:

a) Dakhliga dawladda;

b) Amaano-hayn (trust) kasta ama lacagaha kale ee loo hayo ku meel gaadh ahaan ama sababo kaleba, uuna u hayo sarkaal, kaas oo ah ama noqon kara sarkaal dawladeed, isaga oo awoodiisa rasmiga ah adeegsanaya, kali ahaan ama isaga oo uu weheliyo qof kale;

**xxv.** “**Sarkaal Dawladeed”:** Waxaa loola jeedaa qofka haya ama matalaya xafiis qaranka u adeega;

**xxvi.** **“Ha’yad Dawladeed**”: Waxaa loola jeedaa ganacsi, hay’ad ama wakaalad, taas oo Qodobka 48aad ee Xeerkani dabakhayo. Iyada oo aan la raacayn qodob-hoosaadka (b) wakaalad dawladeed waxaa loola jeedaa:-

(a) Hay’ad ku aasaasan Xeer aan ahayn xeerka shirkadaha; ama golayaasha deegaanada; iyo

(b) Shirkad ku aasaasan Xeerka Shirkadaha taas oo dawladdu ama Shirkad-Qaran awood u leedahay in ay:

(i) maamusho cida ka mid noqonaysa Gudida Agaasinka ee shirkadda;

(j) hogaaminayso, ama gacanta ku hayso ku hogaaminta in ka badan boqolkiiba konton tirada ugu badan ee codadka laga dhiiban karo kulanka guud ee shirkadda;

(ii) Xukunto in ka badan boqolkiiba konton saamiyada raasamaal ee la soo saaray ee shirkadda, marka laga saaro qayb kasta oo ka mid ah saamiyadaasi raasamaal ee la soo saaray ee aan lahayn wax xuquuq ah oo ay kaga qayb galaan marka laga reebo qadarka loo cayimay ee loo qaybin doono macaash ahaan ama raasamaal ahaan.

**xxvii.** **"Hantida Dawladda"** Waxaa loola jeedaa khayraadka ay dawladdu leedahay ama ku jira gacanta ama haynta dawladda;

(i) **"Nidaamin"** Waxaa loola jeedaa shuruudaha loo adeegsado wixii kharash ah iyo risiidhada qaabka loola macaamilayo iyada oo loo eegayo xeerarka fasaxaya, oo ay ku jiraan Xeerkan iyo hay'ada kasta oo kale oo loogu igamaday, xeer-nidaamiye, awaamiirta, iyo tilmaan bixinaha lagu soo saaray si waafaqsan Xeerkan;

(ii) **“Khayraad”** Waxaa loola jeedaa oo kamid ah; lacagta, bakhaarada, hantida, alaabta, amaahda, iyo maalgalinta;

(iii) “**Xoghaya Qasnada**” Waxaa loola jeedaa agaasimaha guud ee wasaaradda ka masuulka ah maaliyadda ee madaxwaynaha jamhuuriyadda soomaaliland ugu magacaabay inuu noqdo xoghayaha qasnadda.

(iv) **“Kharash Qaanuuni Ah**” Waxaa loola jeedaa, Kharashaadka Dastuurka JS ama Xeer kale oo kasoo baxay Golaha Wakiilada oo Xeerkani ku jiraa uu waajibeyey in laga bixiyo kaydka dakhliga guud laakiin kuma jiraan kharashaadka lacagaha hore loo qoondeeyey.

(v) **“Xeerka Kaabista Qoondada”** Waxaa loola jeedaa xeer kasta oo ujeedadiisu tahay in u dheeri ku noqdo ama lagu kaabo qoondadii hore ee la sharciyeeyay.

## QAYBTA II AAD
## <u>Siyaasadda Dhaqaalaha</u>

### *Qodobka 1aad*
### *Masuuliyada Golaha wasiirada*

Golaha Wasiiradu waxay masuul ka noqon doonaan: -

1) Oggolaanshaha ujeedooyinka barnaamijyada ballaadhan ee Dowladda iyo mudnaanta siyaasadaha miisaaniyadda ee sannadka soo socda iyo labada sano ee ku xiga ka dib dhamaadka sanad

xisaabeedka, sida ku cad qaab-dhismeedka miisaaniyadda;

2) Oggolaanshaha qaab-dhismeedka Miisaaniyadda , gaar ahaan bartilmaameedyada dakhliga guud, kharashaadka guud iyo dheelitirka xisaabeed (fiscal blance).

3) Ogolaanshaha Mashruuca Maaliyada sanadlaha ah ee Wasiirku diyaariyey.

4) Inay ka baaraan-degaan, oo ay raacaan warbixinta guud ee fulinta miisaaniyada sadex-biloodka ah ee Wasiirku diyaariyey;

5) Inay tixgeliyaan oo raacaan warbixinta Dhaqaalaha Qaranka ee sanadkii lasoo dhaafay iyo sidoo kale warbixinta fulinta Miisaaniyada ee Wasiirku diyaariyey.

### *Qodobka 2aad*
### *Dejinta Siyaasadda Dhaqaalaha iyo Talada Wasiirka*

1) Wasiirku waxa uu Dawladda Somaliland u dejin doonaa isla markaana fulin doonaa siyaasad dhaqaale (macro-economic) iyo qaab Siyaasadeed maaliyadeed (fiscal policy), isagoo taas ka duulayana waxa uu:

*(a)* Kala talin doonaa dawladda wadarta kheyraadka maaliyadeed ee ay tahay in guud ahaan loo qoondeeyo qaybta dawladda iyo heerarka ku habboon ee khayraadka maaliyadeed ee ay tahay in loo qoondeeyo

mashaariicda gaarka ah ee hoos yimaada Qaybta Dawladda;

*(b)* Kormeeri doona una kuur gali doona maaliyadda dawladda;

*(c)* Isku-duwayaa isla markaana isku xidhayaa xidhiidhka maaliyadeed ee ka dhaxeeya Soomaaliland iyo dawladdaha Caalamka.

2) Wasiirka Maaliyadu waxa uu Golaha Wakiilada warbixin Saddex-biloodle ah ka siinayaa:

(a) Dhaqaalaha hadda jira iyo dhaqaalihii ku tala-galka ahaa ee dawladda;

(b) Maaliyadda Dawladda, iyo;

(c) Siyaasadda maaliyadeed ee dawladda

## QAYBTA III AAD
## Diyaarinta iyo Habraaca Miisaaniyadda

### *Qodobka 3aad*
### *Ujeedada Qaybta III<sup>aad</sup> ee Xeerka*

1) Qaybta IIIaad ee Xeerku waxa ay ina siinaysaa habsami u maamulida, habraaca miisaaniyadda iyo qaab nidaamsan oo ka midho dhaliya arrimaha kale ee ku xidhan , Waxanay dajinaysaa habraacyada keenaya diyaarinta iyo u gudbinta miisaaniyadda dawladda, iyo xeerka Sharci ee Maaliyadda, Golaha Wakiilada, masuuliyadaha kuwa masuul looga

dhigay diyaarinteeda iyo u gudbinta miisaniyadda dawladda ee dhinaca Golaha Wakiilada.

2) Iyo sidoo kale waxyaabaha aasaasiga u ah Diyaarinta Miisaaniyada (composition of the budget).

### ***Qodobka 4aad***
### ***Qaab-dhismeedka Miisaaniyadda***

1) Wasiirku waxa uu suurto gelin doonaa in miisaaniyadda la diyaarsho, wuxuuna u gudbin doonaa Golaha Wasiirada, iyadoo lagu salaynayo dhaqaalaha guud iyo qaab-dhismeedka siyaasadda Maaliyadda.

2) Ujeedada ku xusan qodobka 5aad, farqadiisa (1aad) ee Xeerkan, Wasiirku muddo aan ka dambayn maalinta ugu danbaysa bisha (6) Lixaad (June) ee sannad maaliyadeed kasta, wuxuu diyaarin doonaa oo horgeyn doonaa Golaha Wakiilada qaab-dhismeedka siyaasadda lacagta iyo dhaqaalaha guud oo saddex-sannadoodle ah iyo barnaamijyada dhaqaalaha iyo horumarinta bulshada ee diyaarinta qiyaasaha u danbeeya ee gudbinta dakhliga iyo kharashka ee sannad maaliyadeedka soo socda.

3) Wasiirku, muddo aan ka dambayn maalinta ugu danbaysa ee bisha June ee sannad maaliyadeed kasta iyo inta lagu gudo jiro diyaarinta gudbinta qiyaasaha dakhliga iyo kharashka sanad maaliyadeedka soo socda, waxa uu Golaha Wasiirada hordhigi doonaa qaab-dhismeedka odoroska

dakhliga iyo kharashka hordhaca ah ee sanad maaliyadeedka soo socda.

4) Wasiir kastaa wuxuu suurto gelin doonaa in la diyaariyo Warbixin Siyaasadeedka Wasaaradiisa ee ku saabsan odoroska dakhliga iyo kharashaadka hordhaca ah ee la gudbiyey si waafaqsan qodob-hoosaadka 5aad (3) Xeerkan.

5) Warbixin siyaasadeedka la diyaariyay ee ku xusan qodob-hoosaadka 5aad (4) ee Xeerkan waxaa laga dhigi doonaa qaabka uu cayimo Wasiirka Maaliyada ka masuulka ahi, waxayna yeelan doontaa faahfaahino dheeraad ah iyo ilaa xadka najiidadda laga gaadhey hadafkii bartilmaameedyada u ahaa lacagta la helay iyo kharashka la galay.

6) Wasiirku, muddo aan ka dambayn maalinta ugu danbaysa ee bisha Todobaad (July) ee sannad maaliyadeed kasta, wuxuu soo saari doonaa; wareegtooyinka miisaaniyadda, hagayaasha, iyo taariikhaha ay macluumaadka uga baahanyihiin saraakiisha Xisaabaadka ee looga baahanyahay inay u soo gudbiyaan Miisaaniyada si waafaqsan qodob-hoosaadka 6aad, farqadiisa (1aad) ee Xeerkan.

7) Golaha Wakiiladu wuxuu awood u leeyahay inuu wax ka bedeli karo Qorshaha iyo qaabka guud ee Miisaaniyada, isla markaana uu madaxyada iyo madax-xigeenada (Heads and Sub-heads) isku bedeli karo. Dhinaca kale, Golaha Wakiiladu awood uma laha ay wax kaga bedelaan wadarta guud ee Miisaaniyada.

### *Qodobka 5aad*
### *Gudbinta Odoroska Dakhliga iyo Kharashaadka*

1) Madaxa wasaarad dawladeed, waax, dawlad hoose ama heer gobol, komishan iyo hay'ad kastoo kale oo dawladeed oo hesha qoondaymo, waa inay Wasiirka u gudbiyaan iyaga oo raacayo qaabka loo dajiyay odoroska hordhaca ah ee dakhliga iyo kharashaadka wasaaradaas, waaxdaas, dawladda hoose iyo gobolkaas, komishanka ama hay'ad kastoo kale oo dawladeed, ee sannad maaliyadeedka soo socda, wakhti aan ka dambayn maalinta ugu danbaysa ee bisha Sideedaad (August ) ee sannad maaliyadeed kasta.

2) Odoroska la diyaariyay lana gudbiyay sida ku xusan qodobka 6aad, farqadiisa (1aad) ee Xeerkan, wuxuu Wasiirku horgeyn doonaa Golaha Wasiirada, laakiin odorosyada hay'adaha dastuuriga ah kuwaas oo kharashaadkooda si toos ah looga gooyo kaydka Dakhliga Guud, waxaa la soo hor dhigi doonaa iyadoo aan waxka bedel lagu samayn, hase yeeshaee, waxay yeelan karaan soo jeedimo ay samaysay Dawladdu.

3) Wasiirka ka masuulka ah maaliyaddu, wuxuu suurto gelinayaa in la diyaariyo, isla markaana laga ansixiyo Golaha Wakiisarada oo loo gudbiyo lana hordhigo Golaha Wakiilada sannad maaliyadeed kasta, laakin xaalad kasta waa in aanay ka dambayn maalinta ugu horaysa ee bisha Tobnaad (October) ee sannad maaliyadeedka, odoroska dakhliga iyo kharashka dawladda Soomaaliland sida ku xusan

Qodobka 6aad farqadiisa (1aad) ee Xeerkan ee loo diyaariyay sannad maaliyadeedka ku xiga (for the next financial year) iyada oo la raacayo Qodobka 55aad ee Dastuurka JSL.

### *Qodobka 6aad*
### *Tusmada Hordhaca ah ee Odoroska Dakhliga iyo Qaab-Dhismeedka Kharashka*

1) Tusmada hordhaca odoroska dakhliga iyo qaab-dhismeedka dawladda sannad maaliyadeedka soo socda ee la diyaariyay loona gudbiyay Golaha Wakiilada sida lagu xusay qodobka 5aad, farqada (3) ee Xeerkan, waxaa si dhakhso ah Shir-gudoonka Golaha Wakiiladu ugu gudbin doonaa, Gudi Hoosaadka Ganacsiga, Dhaqaalaha iyo Maaliyadda ee Golaha Wakiilada.

2) Gudida Dhaqaalaha, Maaliyadda iyo Ganacsigu waxay si taxadar leh u baadhi doontaa tusmada hordhaca ah ee odoroska, waxayna soojeedimo u gudbinayaan Shir-gudoonka kaasi oo dabadeeto u diri doona Wasiirka masuulka ka ah Maaliyadda.

3) Guddida Dhaqaalaha, Maaliyadda iyo Ganacsigu waxay Golaha Wakiilada u gudbin doonaan soo jeedin si uu uga doodo. Kadib Talooyinka uu soojeediyo Golaha Wakiiladdu, waxaa loo diri doonaa Wasiirka masuulka ka ah Maaliyadda si uu talaabada ku haboon u qaado.

4) Ujeedada ku cad qodobka 7aad, farqadiisa (2aad) ee Xeerkan, Guddida Dhaqaalaha, Maaliyadda iyo

Ganacsigu, iyaga oo gudanaya waajibkooda waxay ka dalban karaan Wasiirka ama qof kasta oo haya Xafiis Qaran ama shakhsiyaad rayid ah in ay u soo gudbiyaan qoraal kooban ama ay Guddida hor yimaaaddaan si ay u siiyaan caddaymo.

***Qodobka 7aad***
***U bandhigidda Golaha Wakiilada Mashruuc-Sharci oo Maaliyadeed***

(a) Iyadoo la raacayo Dastuurka JSl iyo qodobka 8aad, farqadiisa (2aad) ee Xeerkan, kadib markay ansixiyaan Golaha Wasiiradu, Wasiirku wuxuu diyaarinayaa oo u horgeynayaa Golaha Wakiilada sida ugu dhakhsaha badan ee ugu suurto-galsan iyo xaalad kasta oo jirta ugu dambayn maalinta ugu horaysa bisha Sideedaad (8) ee sannad maaliyadeed kasta:-

(a) Odorosyada dakhliga iyo maaliyadda ee loo baahanyahay in lagu fuliyo hawlaha dawladda;

(b) Odoroska kharashka dawladda ee sannadkaas ee loo qoondeeyey qoondada kharashka, isaga oo Wasiirku u tixgelinayo qoondadaas mid muhiim ah, isla markaana ku daraayo kharashkaas:-

(i) Warbixin ku saabsan ujeedada kharashkaasi loo isticmaali doono;
(ii) Cadaymo ku saabsan kala saarida wax soo saarka la rajaynayo qoondada sanadka iyo hawsha lagu qabanaayo; iyo

(iii) Odorosyada ku saabsan xaddiga looga baahanyahay damaanad ahaan in lagu soo saaro sannad maaliyadeedkan soo socda.

(b) Iyadoo la raacayo ujeedada qodobka 6aad, farqadiisa (3aad) iyo qodobka 8aad, farqadiisa (1aad) ee Xeerkan, Wasiirku waa inuu:-

(a) hubiyaa in Wakhtiga soo jeedinta odoroska loogu diyaariyey sidii loo baahnaa warbixin dhamaystiran Golaha Wakiilada taasi oo:-

(i) Soo bandhigaysa caqabadaha,iyo horumarka ay muujinayaan tusayaasha dhaqaalaha dalku;

(ii) Astaynaysa muddada uu garto Wasiirku in ay ku habboontahay Qorshaynta siyaasad sannad maaliyadeedka dawladdu,

(iii) Saadaal ka bixinaysa tusayaasha ku xusan xarafka (i) ee faqraddan, ee sannadka lagu jiro iyo muddada uu go'aamiyo Wasiirku ee ku xusan xarafka (ii) ee isla farqadan:

(iv) bixinaysa warbixin faahfaahsan oo ku saabsan horumarka la taabankaro ee dhawaan la gaadhay iyo saadaasha muddada uu go'aaminayo Wasiirku sida ku xusan xarafka (ii) qodobka 8aad, farqadiisa (2aad), marka loo eego:-

***(aa)*** *dakhliga*

***(bb)*** *raasamaalka jootada ah iyo kharashaadka, warbixinaha sanadka gudihiisa.*

***(cc)*** *amaahashada iyo bixinta daynta*

***(dd)*** *daynta aan la saadaalin karin*

***(ee)*** *warbixinta sannadka gudihiisa ee dakhliga iyo kharashaadka; iyo*

***(ff)*** *warbixin kasta oo kale marka laga hadlayo hantida iyo qaamaha kaasi oo uu Wasiirku u arko in ay muhiim tahay;*

(b) Waa inuu Wasiirku siin karaa Golaha Wakiilada warbixino dheeraad ah haddii Uu arko in ay tahay lagama maarmaan inta lagu gudo jiro sannad maaliyadeedka.

(c) Haddii Golaha Wakiilada la kala diro ama mudadiisu dhamaato saddex bilood ka hor bilawga sannad maaliyadeed, odoroska sannad maaliyadeedkaasi waxaa la hordhigi karaa Golaha Wakiilada sida ugu macquulsan ka dib bilawga sannadkaas

(d) Qoondada Kharashka ee ku jirta odoroska, ee aan ahayn kharashka sharciga ah, waxaa lagu dari doonaa Xeerka sharci ee Qoondada kaasi oo loogusoo bandhigi doono Golaha Wakiilada si ay uga bixiso qadiyada Dakhliga Guud xadiyada muhiimka u ah dakhligaas iyo qoondaynta

xadiyadaas ujeedada lagu cayimay Xeerka sharci dhexdiisa.

(e) Xeer sharci kasta oo loo gudbiyo Golaha Wakiilada waxaa la socon doona tusmada soo jeedinta miisaaniyadda, haddii ay jiraan wax ku saabsan dakhliga iyo kharashka muddo aan ka yarayn laba sano ka dib dhaqan galkeeda

***Qodobka 8aad***
***Warbixinta Amaahaha, Deeqaha, iyo Dammaanadaha***

Wasiirku wakhtiga uu ujeedinayo Golaha Wakiilada Xeerka-sharci ee Maaliyadda , wuxuu ka horsiinayaa in loo jeediyo macluumaadka la xidhiidha isku gaynta daynta Dawlada Somaliland ee sannad maalyadeedkaas, taas oo muujinaysa waxyaabo badan oo ay kamid yihiin;

(a) Isku gaynta raasamaalka iyo ilaha amaahaha iyo daynta;

(b) Xaddiga ku ururay oo ah qaab faa'iido oo waafaqsan Shareecada ee amaah kasta iyo dayn kasta;

(c) Waxa loogu talo galay bixinta ama dib u bixinta dayn kasta iyo amaah kasta;

(d) Isticmaalka iyo wax qabadka amaah kasta iyo dayn kasta oo la soo qaatay,iyo ilaa xadkee la gaadhay hadafyadkii bartilmaameedka ahaa ee dayn kasta ama amaah.

2)Wasiirku wakhtiga uu u jeedinayo Golaha Wakiilada xeerka Sharci ee Maaliyadda wuxuu ka horaysiin

doonaa macluumaad la xidhiidha qadarka guud ee deeqaha la siiyay Soomaaliland, iyo ilahooda, taas oo muujinaysa isticmaalkooda, iyo wax qabadka deeq kasta, oo ay ku jirto illaa iyo xadka la gaadhay hadafyadii bartilmaameedka ahaa ee deeq kasta

3) Wasiirku wakhtiga uu u jeedinayo mashruuc sharci Golaha Wakiilada, wuxuu ku dari doona macluumaad la xidhiidha dhmamaan damaanadaha (Masuuliyad qaadista); amaahda, daynta iyo deeqaha wasaaradaha, waaxaha, wakaaladaha, dawladdaha hoose iyo gobolada ama hay'adaha dawladda.

***Qodobka 9aad***
***Miisaaniyad Kaabista***

1) Haddii sannad maaliyadeed gaar ah, la ogaado in xaddiga uu qoondeeyey Xeerka qoondadu aanu ku filnayn ama ay soo baxday baahi aan wax kharash ah aanu u qoondayn Xeerka Qoondadu, odoros kaabis ah, oo muujinaya xaddiga looga baahanyahay ayaa la hordhigi doonaa Golaha Wakiilada, iyo diwaanka kharashka waxaa lagu dari doonaa Xeerka sharciga qoondada kaabista oo la soo hordhigi doonaa Golaha Wakiilada si loo helo qoondayntooda.

2) Odoroska kaabista ah ee lagu diyaariyay sida ku xusan xubinta (1) waxa lagu muujin doonaa saamayn kasta oo ku saabsan waxyaabaha looga baahanyahay maal galinta dawladda ee la gudbiyay ee ku xusan faqrada (a) ee Xubinta (1) ee Qodobka (8) ee Xeerkan iyo isbedel kasta oo la filayay oo

warbixinta lagu bixiyay Xubinta (iii), faqrada (c) qodob-hoosaadka (1aad) ee Qodobka (8) ee Xeerkan.

### ***Qodobka 10aad***
### ***Kharashyada Qarsoodiga ah***

1) Iyadoo la tixgalinayo danaha amaanka, waxaa jiri kara kharashyo qarsoodi ah oo ku jiri doona miisaaniyadda Wasaaradaha masuulka ka ah aarrimaha gaashandhigga,gudaha,iyo madaxtooyada kuwaas oo aan u furnaan doonin lafo-guridda guud ee Golaha Wakiilada.

2) kharashyada la xidhiidha Wasaaradaha ee ku jira miisaaniyadda ku tilmaaman isla qodobkan farqadiisa (1aad) oo keliya ayaa loola dhaqmi karaa qarsoodi.

3) Nidaam hoosaad hoos imaanaya Xeerkan ee la xidhiidha kharashaadka qarsoodiga ah ayaa qeexi doona madaxyada kharasheed ee u qalma inloola dhaqmo ”kharash Qarsoodi ah” waxaanu u baahan doonaa ansixinta Golaha Wakiilada.

4) Kharashaadka qarsoodiga ah waxaa la gelin doonaa miisaaniyadda, waxayna gali doontaa miisaaniyadda wasaaradaha ku xusan Xubinta 11 (1) taas oo ka mid ah miisaaniyadda u qoondaysan, mana noqon karaan kuwo aan miisaaniyadda ku jirin.

5) Wasiirku wuxuu Madaxyada kharashka qarsoodiga ah kahor faahfaahinayaa fadhi Golaha Wakiilada ah oo xidhan.

6) Baadhista Kharashaadka qarsoodiga ah waxaa samayn doona Hanti-dhawraha Guud ee Dawladda, Warbixinta qarsoodiga ahna waxa loo gudbin doonaa Madaxweynaha iyo Shir-gudoonka Golaha Wakiilada oo Fadhi xidhan ugu gudbin doona Golaha.

### ***Qodobka 11aad***
### ***Kharashka Dheeraadka ah (Excess Expenditure)***

1) Haddii xisaab xidhka ku saabsan sannad maaliyadeed gaar ah, la helo in lacag la kharash gareeyey:-

(a) Kharash kasta oo ka bata qadarkii uu u qoondeeyay Xeerku Qoondadu;

(b) Arrin aan wax miisaaniyad ah loo qoondayn loona kharash gelin; ama

(c) Dheeraad ka ah xaddiga loo asteeyay ee qiyaasta qayb ka noqonasa qoondada kharash ee ku jira odoroska ay ansixiyeen Golaha Wakiiladu sannad maaliyadeedkaasi, taas oo aan qadar kale loo hayn sida ku cad Xeerkan ama sharci hoosaad kasta oo lagu soo saaray dabadeeto Xaddiga dheeraadka ah ee la bixiyey, ama aan la qoondayn hadba sida Uu xaalku yahay, waxa ku jiri doona warbixin ah kharashka Dheeraadka ah taas oo la hordhigi doono Golaha Wakiilada sannad Maaliyadeedka, loona gudbin doono Guddida Ilaalinta Hantida Qaranka ee Golaha Wakiilada

2) Gudida Illaalinta Hantida Qaranka ee Golaha Wakiiladu waxay ku wargelin doonaan Golaha Wakiilada warbixin ku saabsan kharashka dheeraadka ah ee lagu xusay farqada (1aad) ee qodobka12aad, laba bilood gudahood ka dib marka loo soo gudbiyo.

3) Marka la helo warbixinta Gudida Illaalinta Hantida Qaranka ee lagu sheegay farqada (1aad) ee Qodobka 12aad, Golaha Wakiiladu wuxuu mooshin ku ogolaan doonaa dheeraadkaasi ama qadarka la bixiyey balse aan la qoondayn, in lagu dalaco lacagta dawladda, qandarkaasi waxa loo qaadan doonaa in ay tahay kharash dheeraada waxana lagu dari doonaa Xeer Sharciga Qoondada Dheeraadka ah si loo qoondeeyo.

4) Dheeraad kasta ama xaddi kasta oo la kharashgareeyey laakiin aan la qoondayn oo aan lagu ogolaan si waafaqsan farqada (3aad) ee Qodobka 12aad ee Xeerkan, waxaa loo qaadan doonaa khasaare ku dhacay lacagta dawladda waxana loola macaamili doonaa si waafaqsan farqada (3aad) ee Qodobka 51aad ee Xeerkan.

### ***Qodobka 12aad***
### ***Kharashka la galo intaan miisaaniyaddu dhaqangelin***

1) Haddii Xeerka Qoondadu aanu dhaqan gelin bilawga sannad maaliyadeed, Madaxweynuhu wuxuu awood kharash uu saxeexay isagu, oo ku socda Wasiirka, ku ogolaan doonaa in lacag laga

saaro Dakhliga Guud iyada oo ujeedadu tahay in la dhamaystiro kharashaadka lagama maarmaanka u ah wadida hawlaha dawladda illaa oo ay dhacaan saddex bilood oo ah bilawga sannadkaasi, ama marka uu dhaqan galo xeerkaasi, kolba midkii soo horreeya;

2) Xaddiga lagu ogolaaday qodob-hoosaadka (1) ee Qodobka 13aad ee Xeerkan kama badan doonto xaddiga ku cad in loo baahanyahay xisaabta ee khuseeya adeegaasi ee qoondada kharashka ee ay ku ansixiyeen Golaha Wakiiladu qaraar sannad maaliyadeedkii hore

### *Qodobka 13aad*
### *Muddada Qoondooyinka iyo Awoodda kharashyada*

1) Qoondo kasta oo ay ku sameeyaan Golaha Wakiiladu lacagaha dawladda si loogu adeego sannad maaliyadeed gaar ah, iyo awood kharash kasta ama ogolaansho kale oo lagu soo saaray si waafaqsan Xeerkan oo khuseeya sannad maaliyadeedkaasi, waxay dhammaan doontaa oo joogsan doontaa inay jirto inay yeelato wax dhaqan gal ah marka la xidho sannad maaliyadeedkaasi wixii hadhaa ah een la filayna ee ah lacagta laga saaray Keyda Dakhliga Guud waxaa lagu dari doonaa Dakhliga Guud.

### *Qodobka 14aad*
### *Miisaaniyada Golaha Wakiilada*

Miisaaniyada Golaha Wakiilada waxaa waaran (warrant) sadex-biloodle ah loogu shubayaa Akoonka (A/C) Xisaabta ee Golaha Wakiiladu ku leeyahay Bangiga Dhexe ee Dawladda.

### ***Qodobka 15aad***
### ***Guddida Dhaqaalaha, Maaliyadda iyo Ganacsiga ee Golaha Wakiilada***

1) Guddida Dhaqaalaha, Maaliyadda iyo Ganacsiga ee Golaha Wakiiladu waxay Diirada saarayaan odorosyada hordhaca ah ee

(a) dakhliga iyo kharashka, iyo dhaqaalaha guud iyo qaab dhismeedka siyaasadda Maaliyadda iyo barnaamijyada, waxayna tala soo jeedintooda u gudbin dooonaan Shir-gudoonka Golaha Wakiilada;

(b) Waxay eegi doonaan Xeerarka Maaliyadda, isla markaana waxay diyaarin doonaan haddii ay jiraan waxka bedelyo iyo soojeedimo, waxayna u gudbinayaan Shir-gudoonka Golaha Wakiilada;

(c) Waxa ay fulin doonaan shaqooyinka kale ee la xidhiidha Sharciga Maaliyadda ee uu u xilsaarto Golaha Wakiiladu ama Xeerkani dhigayo ama Xeer kasta oo kale oo dhaqan gal ah.

### ***Qodobka 16aad***
### ***Xafiiska Miisaaniyadda Golaha Wakiilada***

1) Golaha Wakiiladu wuxuu yeelanayaa Xafiis Miisaaniyadeed (budget office), kaasi oo ay ka hawl-

galaan khabiiro dhinaca miisaaniyadda iyo dhaqaalaha ah oo shaqaale rasmiya ah ama shaqaale ku shaqeeya galin ahaan kolba sida iyo waqtiga loogu baahdo. Xafiiskani wuxuu falanqayn iyo lafo-gur dhamaystiran Golaha iyo Gudiyadiisa ka siin doonaa Soo jeedimaha Dhaqaale, Dakhli, Warbixinta iyo Odoroska habraaca Miisaaniyada.

### *Qodobka 17aad*
### *Ku Guul Daraysiga Dhamaystirka Shuruudaha Miisaaniyadda*

1) Haddii Wasaarad, Waax, Wakaalad, Dawlad Hoose, Gobol, ama Hay'ad Dawladeed ku guul daraysato soo gudbinta wax kasta oo looga baahanyahay miisaaniyadda sida ku xusan Xeerkan, Golaha Wakiiladu waxay ku qasbi karaan Wasiirka ay khuseyso inuu hor yimaado Golaha si uu u siiyo sharaxaad ku saabsan xaalada keentay guul daradaas.

2) Haddii ay cadaato in Sarkaal si kas ah ama si dayacaad ah uu u sababay in Wasaarad, Waax, Wakaalad, Dawlad Hoose ama Hay'ad Dawladeed ku guul daraysato dhamaystirka shuruudaha ku xusan Xeerkan, qofkaas (Sarkaalkaas) ayaa shakhsiyan ka masuul noqon doona Guuldaraas.

## QAYBTA IV AAD

## Illaalinta iyo Maamulka Maaliyadda Dawladda

### *Qodobka 18aad*
### *Kormeerka, Xakamaynta iyo Maamulidda Maaliyadda Dawladda*

Wasiirku waa in uu:

(a) Hubiyaa in la dejiyey hababkii dawladeed ee qorshaynta, qoondaynta iyo miisaaniyadda si loo adeegsado khayraadka loona hagaajiyo dhaqaalaha, hufnaanta ,ka midho dhalinta iyo hawlgudashada,iyo maamul wanaagga dawladda ;

(b) Tixgelinayaa dhammaan codsiyada khuseeya xaaladaha lacagta Keyda Dakhliga Guud, haddii wasiirku u arko in ay tahay lagama maarmaan, wuu aqbalayaa in lagu daro odoroska kharashka si loogu gudbiyo Golaha Wakiilada si waafaqsan qodobka 8aad ee Xeerkan iyo;

(c) Sare u qaadista Korjoogeynta Golaha Wakiilada ee la xidhiidha kheyraadka Qaranka iyo Maaliyadda Qaranka, isaga oo joogteynaya nidaam cad kaas oo bixinaaya macluumaad buuxa, si:-

(i) Kor loogu qaado korjoogeynta Golaha Wakiilada ee ku aadan khayraadka iyo maaliyadda dawladda;

(ii) Loo hubiyo joogteynta nidaamsan isla markaana hufan ee maamulka kharashka,khayraadka iyo maaliyadda

Qaranka gaar ahaan, in badeecadaha ama adeegyada loosoo iibiyey ama loo bixiyey hab ku salaysan cadaalad iyo sinaan, iyo tartan furan, isla markaana hufan qiimo ahaan iyo;

(iii) Loo xaqiijiyo waxku'oolnimada iyo hufnaanta qiime ahaaneed ee Maamulka Lacagta Kaydka Dakhliga Guud iyo kayd kasta oo kale oo lagu aasaasay xeerkan iyo lacagta kale ee dawladda ;

(d) Hubiyaa in la aasaasay Xarunta Xisaabaadka ee Madaxa-banaan, si kor loogu qaado xirfad xisaabeedka iyo la socodka xisaabiyayaasha Soomaaliland;

(e) Hubiya in la asaasay Guddida Dejinta Maba'diida Habsamida Xisaabaadka (Accounting Standards Board) oo ah mid ka mid ah guddiyada hoos tegaya Xarunta Xisaabaadka ee lagu aasaasay isla Qodobkan 18aad, farqadiisa (1aad), xarafka (d). Guddida Dejinta Maba'diida Habsamida Xisaabaadku waxa ay kala talinayaan Xisaabiyaha Guud dejinta xisaabaadka ee hab raaca wasaaradaha, waaxaha iyo wakaaladaha, si ay xisaabaadka ugu diyaariyaan qaabka ugu habboon ee la rabo inay diyaariyaan; iyo

(F) Xaqiijiyaa Aasaasida Guddi Qaran oo Kormeer oo Madax-banaan, kuwaas oo noqonaya Golaha Sare ee Maamulka Xarunta Xisaabaadka lagu aasaasay isla Qodobkan 18aad, farqadiisa (1aad), xarafka (d).

2) Ujeedada ku xusan isla qodobkan 18aad, farqadiisa (1aad), marka loo eego Xeerkan, Wasiirka ayaa ka masuul ah Maamulka Keydka Guud ee Dakhliga iyo kormeerka iyo illaallinta dhammaan waxyaabaha la xidhiidha arrimaha Maaliyadda dawladda.

### ***Qodobka 19aad***
### ***Xeerarka iyo Awaamiirta***

1) Wasiirku wuxuu samayn karaa xeer-hoosaad, sharci-hoosaadyo, awaamiir iyo tilmaamo ula muuqda in ay yihiin lagama maarmaan, kuna habboon habsami u fulinta ujeedada Golaha Wakiilada, badbaadada, dhaqaalaha iyo ka faa'iidaysiga dakhliga iyo hantida dawladda.

2) Wasiirku wuxuu qaadayaa dhammaan talaabooyinka ku habboon si uu hubiyo in awaamiirta iyo tilmaamahii la ogaysiiyey gaadheen ciddii loogu talo galay laakiin lagama maarmaan noqon mayso in lagu daabaco tilmaan-bixinahaasi iyo amaradaasi baahinta rasmiga ah.

3) Sarkaalka kasta oo Xisaabeed ama sarkaal dawladeed oo qodobkani khuseeyo wuxuu u hogaansami doonaa kuna dhaqmayaa Xeer-nidaamiyeyaasha lagu muujiyey xeerkan iyo tilmaamaha ama awaamiirta lagu bixiyey isla Xeer-nidaamiyayaashaas iyo dhamaan Tilmaamaha laga yaabo inuu soo saaro Xisaabiyaha Guud waqti illaa waqti.

### ***Qodobka 20aad***

## ***Magacaabidda, Awoodaha iyo Waajibaadka Xisaabiyaha Guud***

1) Madaxweynaha ayaa soo magacaabaya Xisaabiyaha Guud ee Dawladda markuu ku qanco, isla markaana hubiyo inuu buuxiyey Shuruudaha looga baahanyahay

2) Xisaabiyaha Guud isagoo kala tashanaya Wasiirka Maaliyada, wuxuu magacaabayaa Xisaabiyeyaasha Gobolada iyo Degmooyinka iyo hadii loo baahdo Xisaabiyeyaal Idman.

3) Sida uu qeexaayo Xeerkani, Xisaabiyaha Guud wuxuu ka masuul noqon doonaa:

(a) Xisaab xidhka iyo maamulidda xisaabaadka dawladda;

   (a) Haynta iyo badbaadinta lacagta dawladda;
   (b) Khayraadka dawladda; iyo

   (c) Ujeedadaasi, Xisaabiyaha Guud wuxuu siin karaa awaamiir guud saraakiisha xisaabaadka kuwaas oo la jaanqaadi doona Xeerkan, ama wixii xeer hooosaad ah ee kale ama amar ah ee lagu soo saaray si waafaqsan xeerkan.

4) Xisaabiyaha Guud waa inuu:
   (a) u cayimaa  wasaarad kasta oo dawladeed, waax , keyd , wakaalad ama il kale oo warbixineed in ay soo saarto warbixin xisaabeedka sida ku xusan Qodobka 39aad;

(i) Aasaaska xisaabeed ee la qaadanayo, ka dib marka uu talo ka helo Gudida Dejinta Heerarka Hab-samida Xisaabaadka ee lagu aasaasay Qodobka 18aad(1) (e) ee Xeerkan; iyo

(ii) Nidaamka abyo-abyaynta (kala saarida) ee la adeegsanayo;

(b) Hubiyaa in nidaam habboon oo xisaabeed loo dajiiyay wasaarad kasta oo dawladeed, waax , keyd , wakaalad , ama waax xisaab celineed taas oo la jaanqaadi karta dalabaadka Qodobka 39aad taas oo hubsiimo u ah in lacag kasta oo dawladeed oo la helay iyo tan ay bixisay dawladdu si hufan oo hagaagsan loo xisaabiyay;

(c) Hubiyaa in nidaamka hubinta guduhu ka jiraa wasaarad kasta oo ka mid ah dawladda, waax , keyd , wakaalad ama unug kasta oo warbixineed in laga rabo in uu keeno warbixin xisaabeed sida ku xusan Qodobka 39aad ee xeerkan ee ku habboon baahiyaha ururka ay khuseyso lana socda nidaamyada caalami ahaan la aqoonsanyahay;

(d) Diidaa bixinta xaashida lacag bixin kasta oo qalada ama dulucdeeda ay ciladi ku jirto, kaas oo ka hor imanaya Qodobada Dastuurka(xeerka iyo qawaaniinta dawladda) ama xeer-nidaamiye kale, awaamiir kasta ama tilmaan-bixinaha si hagaagsan loo bixiyay iyaga oo waafaqsan xeerkani ama xeer kasta oo kale oo khuseeya

maamulka lacagta dawladda, ama taasi oo si uun u ah mid aan la aqbali karin oo si loo adeegsado in uu noqdo mid taageeraya in lacag dawladeed loo saaro;

(e) Warbixin qoraal ah ka siiyaa Xoghayaha Maaliyadda iyo Wasiirka labadaba cilad kasta oo muuqata oo ku jirta nidaamka dakhli illaalineed ee waaxeed, kharash bixineed, lacagta cadaanka ah, bakhaarada, iyo hanti kasta oo kale oo ay dawladdu leedahay iyo ku xad-gudub kasta ama illaalin la'aan kasta oo xeer-hoosaad, awaamiir, ama tilmaamooyin kuwaas oo ugu iman kara ama loogu keeni karo ogaysiis ahaan;

(f) Hubiyaa , illaa iyo inta suurtogal ah, in ku talogal ku filan ay jiraan xafidaada, illaalinta haynta lacagta dawladda, hantida, alaabta qiimaha leh, qoraalada iyo diiwaanada xisaabaadka, iyo

(g) Sameeyaa taxadar, lagaga hortagaayo lunsi, khiyaaano iyo maamul xumo ku timaaada hantida qaranka isagoo samaynaya baadhis buuxda iyo mid kadis ahba.

5) Xisaabiyaha Guud wuxuu baadhi karaa dhammaan Xafiisyada Dawladda, waxana la siin doonaa:

(a) Fursad (access) uu ku geli karo xafiisyadan mar kasta;

(b) Dhammaan xogaha la hayo ee uu u baahanyahay ama u arko inay lagama maarmaan u yihiin ujeedo dhaqan-gelineed oo waafaqsan qodobka 20aad, farqadiisa (3aad) Xarfaha (a), (b), (c), (d), (e), (f) iyo (g).

6) Xisaabiyaha Guud isagoo gudanaya waajibaadkiisa shaqo ee xeerkani siiyey waxaa uu warbixin sannadle ah siin doonaa wasiirka. Warbixinaha uu waajibiyey qodobka 39aad ee Xeerkani, waxa lagu xaqiijinayaa;

a) Aasaaaska Mabaa'diida ku xusan xarfaha (b) iyo (c) (3) ee Xeerkan qodobkiisa 20aad;

b) Cilad kasta, dabacsanaan, ama arin kale oo marka loo eego ra'yigiisa, saamayn la taaban karo ku yeeshay masuuliyadda Wasiirka ee ku xusan xarafka (c) farqada (1aad) ee Xeerkan qodobkiisa 19aad.

## QAYBTA V AAD
## <u>Maamulka Hantida Qaranka</u>

### *Qodobka 21aad*
### *Siyaasadda guud ee hantida ma guurtada ah*

1) Hantida soo socota waxa iska leh Qaranka, haddii aanay ahayn hanti dadwayne ama shakhsiyaad gaar ahaaneed:

(a) Kanaalada iyo kuwa kale ee biyo mereenka aan dabiiciga ahayn.

(b) Ilaha Dabiiciga ah, ceelal, xerooyinka xoolaha dadweynaha, biyo mareen iyo ilo;

(c) Waddooyinka, dariiqyada iyo meelaha wareegga, jidadka, garoomada dayuuradaha ee rayidka, rakibaada wirelesska , telefoon iyo telefoonka radio rakiban, kuwan dariiqooyinka iyo jidadka safarkii loogu isticmaalo danta dadweynaha, iyo xerooyinka xoolaha lagu hayo, qabuuraha iyo suuqyada,

(d) Hantida maguurtada ah iyo waxyaabaha lagu dhawaaqay inay tariikh ahaan yihiin farshaxanka taariikhiga ah ee muhiimad leh ;

(e) Goobaha iyo dhismayaasha si joogta ah loogu tala galay in dad waynuhu ku cibaadaysto sida diinta Islaamku fartay.

2) Sidoo kale hantida soo socda waxa iska leh Qaranka;

(a) Hantida maguuurtada ah ee aanay cidna lahayn.
(b) Khayraadka macdaneed
(c) Xeryaha iyo bakhaarada ciidamada
(d) Dhismayaasha qaranka , iyadoo loogaga faa'iideysanayo xafiisyada ama adeegyada dadweynaha.
(e) Hanti Kasta ama xaquu leeyahay qaranku eeay xambaarsan sharciga, ama lagu wareejiyay ama iibsi ahaaneed ku timi

3) Siyaasadda guud ee dawladda ee hantida ma guurtada ah een Qofna yeelan Karin waa hanti dawladeed qiraal ahaan.

4) Hanti ma-guurta ka kooban hantida ay tahay in ay buuxiyaan shuruudaha soo socda:

   (a) Hantida ma guurtada ah waata la taaban karo ee cumriga muddada dheer leh ee loo isticmaalo wax soo saarka iyo adeegga cimrigoodu gaadhi karo ugu yaraan hal (1) sano iyo
   (b) Hantida qiimaheedu dhaafsiisan yahay s/l sh. 2,000.000.

5) Hantida ma guurtada ah wax ka mid ah: Dhulka, Dhismayaasha, waddooyinka isku xidha dalka, Buundooyinka, Isgaadhsiinta, iyo kaabayaasha isgaadhsiinta warfaafinta tignooljiyadda kale (ICT), Qalabka Badda, kaabayaasha qalabka Biyaha iyo laydhka, iwm. Halka hantida guurtada ah ee kolba meel la geyn karo ay ka mid yihiin: Qalabka guryaha, gaadiidka, computeriska qalabka xafiisyada, makiinadaha warshadaha, Makiinadaha Beeraha, Qalabka ciidamada, qalabka nabadgelyada Diyaaradaha iwm.

6) Xuquuda nuqulka (copyright) dhabta ah ee hantida aan la taaban Karin sida software (ka) waxay u gaar tahay xukuumadda Iyadaana u umaamuli doonta si waafaqsan heshiiskii dhexmaray iyada, iibiyaha, iyo ciddii hore samaysay.

7) Waxa loo baahanyahay in siyaasadda xukuumaddu ku qotomiso habsami u maamulidda Hantida ma guurtada ah markasta, sidoo kale wasiir kastaana waa in uu sameeyo nidaam ku filan oo lagu Illaaliyo hantida qaranka ee uu masuulka ka yahay isla

markaana hubiyaa inaan la lunsan oo lagu xisaabtami karo.

8) Hab maamul hubineed waa in uu ka jiraa Wasaaradda Maaliyadda, si loo hubiyo in hantidaasi markasta la heli karo, si loogu fuliyo hawlaha qaranka oo ah ujeedadii loo soo iibiyey. Wasiir kastaana wuxuu u xilsaaran yahay in uu hubiyo in aan hantida Dawladda loo leexin meel kale laguna isticmaalin hawlo aan ahayn kuwii loogu talagalay, leexintaas oo wax yeelaysa fulinta mashaariicda dawladda, Waxaa kale oo reeban in hantida dawladda loo isticmaalo dan shakhsi.

9) Si loogu fuliyo hawlihii iyo ujeeddooyinkii loogu talagalay, hantidaasi waa in ay u ahaato mid xaaladdeedu fiicanyahay markasta. Wasiirka Maaliyadduna uu hubiyo markasta Tayo wanaagga hanti kasta oo la soo gado, si joogto ahna dayactir loo la daba joogo qalabka la isticmaalo.

10) Marka laga reebo dhismayaasha dawldadda iyo kaabayaasha hantida, dayactirka hantida kale ee ma guurtada ah waxa u xilsaaran wasaaradda Hawlaha Guud iyagoo ka masuul ah illaanta Hantidaas. Dayactirka daaraha iyo kaabayaasha dawladda dhexe waa masuuliyadda Wasaaradda ay hoos timaado hantidaasi. Sidaas oo kale dawladdaha hoosana waxay masuul ka yihiin dayactirka daarahooda iyo kaabayaasha hantidooda

11) Hanti laga ma baddeli karo goobteeda shaqo oo lama geyn karo meel kale haddii aan marka hore ogolaansho cayiman laga helin Wasaaradda Maaliyadda. Wareejinta hantida waxa ka mid ah iyada oo aga wareejiyo Waaxdii hore uhaysatay laguna wareejiyo cid kale, ama ciddii ay miisaaniyadeedda ugu jirtay laga wareejiyo loona wareejiyo hayad kale

12) Hantida qaranka e sida caadiga uu u maamulo Wasiirka wasaaradda maliyaddu.

13) Marka laga reebo sida sharcigu dhigaayo waxay bixiyaan hantida qaranka xilka ka saaran in ay adeegyada Dowladda gaar ah loo fuliyo Wasiirka mas'uul ka ah sida adeegaas.

14) Wasiirka Maaliyadda ee sugi doona habki casriyeeysan ee diwaangalineed e hantida qaranka maguurtada ah.

15) Wasiirkakasta ee sugi doona habka casriyeeysan ee diwaangalinta dukaamada ee lo xilsaaray wasaaradda

16) Maamulka hantida loo qoondeeyey Madaxweynaha Jamhuuriyadda iyo Golaha Qaranka dayactirka ee diiwaannada la xiriiraka soo dagi doonaa gudahood xirfadeed sida ay u yidhaahdeen musuuliyiintu.

17) Sarkaal kasta oo noqon doona shakhsi mas'uuliyeed ugana ah hantida qaran illaalinteeda iyo gacan ku haynteeda.

GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL

## *PART VII AAD*

## ***Khasnada Qaranka***

### *Qodobka 22aad*

### *Dakhliga khasnada Guud iyo Khasnadaha Kale*

1) Dhammaan dakhliyada iyo lacagaha kale ee la halay ama la ururiyay ujeedooyin ay dawladdu leedahay dartood, oo aan ahayn dakhli ama lacag kale oo ay tahay in lagu baxsho kayd dhigaale kale iyada oo la raacayo xeer hoosaad kale, oo loo aasaasay ujeedo gaar ah ama xeer kasta oo kale, ay hayso waax ka tirsan dawladda oo iyaga ka heshay ujeedaduna tahay in lagu daboolo kharashka waaxdaasi, waxa lagu siin doonaa oo ay ka mid noqon doontaa khasnadda Guud ee Dakhliga. Khasnadda Guud ee Dakhliga waxa lagu hayn doonaa Baanka Soomaaliland, baanka dhexe, waxa uu ahaan doonaa Xisaab khasnadeedka kaliya ee dawlada ledahay. Xisaabta khasnada waxa ay yeelan kartaa xisaab hoosaadyo u gaar ah macaamilka dawladeed ee kala gaarka ah.

2) Si looga hortago shakiga, wixii tixraac lacageed ah oo la ururiyay ama ay heshay dawladdu, oo aanay ku jirin lacagta lagu helay dhigaal ahaan ama lacagta lagu hayo amaano-heyn ahaan (trust) oo ay hayso maxkamadi, sarkaal ka tirsan maxkamad, wakaaladda amaano-heynta qaranka (public trustee), Xeer Illaaliyaha Guud ama lacag kasta oo ku jirta amaano-hayntaasi, oo uu hayo

sarkaal kasta oo kale ujeedooyin ka duwan ujeedooyinka dawladda.

3) Wasiirku waxa uu wareegto, ku aasaasi karaa keydad gaar ah kuwaas oo aan ka mid noqon doonin qayb ka mid ah khasnada Dakhliga ee Guud, wixii laga helo, laga macaasho ama laga dhaliyo khasnadaas marka uu dhamaado sanad maaliyadeedku, dib looma siin doono khasnada Guud ee Qaranka waxase loo hayn doonaa khasnadaas ujeedooyinkii loo aasaasay.

4) Wasiirku waxa uu samayn karaa wareegtooyin waxaanu soo saari karaa awaamiir si loo maamulo loona illaaliyo sanduuq kasta oo lagu aasaasay si waafaqsan farqada 22aad (3) ee Qodobkan.

5) Wixii wareegtooyin ah ee hoos imaanaya farqada 22aad(3) waxa ay

   *(a)* waxa uu sheegi doonaa ujeedooyinka sanduuqaasi gaarka ah loo sameeyay;
   *(b)* Waxa uu aqoonsan karaa sarkaalka xisaabaadka ee ka masuulka ah hawl qabadkaasi;

6) Wax kharash ah lagama gali karo sanduuqaasi gaarka ah marka laga reebo ogolaansho waaran oo u saxiixay Wasiirku oo lagu hagaajiyay sarkaal xisaabeed ee ka masuul ah.

7) Waaranka lagu xusay farqada (4) laguma soo saari karo marka laga hadlayo sanad maaliyaded kasta haddii aan odoroska dakhli iyo kharash ee

sanduuqa gaarka ah ee sanad maaliyadeedkaasi, ee lagu diyaariyay iyada oo la raacayo tilmaaha Xoghayaha Khasnada oo uu ansixiyo Wasiirku, aan la horgayn Golaha Wakiilada.

8) Hadii Golaha Wakiilada la kala diro ama ay mudadoodii xilku dhamaato mudo ka yar saddex billood inta uusan bilaabmin sanad maaliyadeed, odoroskii sanadkaasi waxa la gayn doonaa Golaha Wakiilada sida ugu dhakhso badan ee suurtogasha bilawga sanadkaasi qodobka 20aad baana la raaci doonaa, iyada oo lagu samayn doono badalaadaha lagama maarmaanka ah si loo ogolaado wixii laga saarayo sanduuqaasi.

9) Haddii Wasiirku ku qanco in midkood;

   (a) lacagta ka mid ah sanduuq gaar ah in ay dhamaatay isla maarkaana uusan jirin qodob sharci oo qeexaya in lacag kale oo dheeraad ah in lagu daro sanduuqa; ama

   (b) Wasiirku waxa uu, ka dib marka uu helo qoraal sharci ah, wareegtooyin, waa uu kala diri doonaa sanduuqaasi lacag kasta ama khayraadka kale ee yaalay sanduuqa waqtigaasi kala dirista, waxa laga dari doonaa khasnada Dakhliga Guud.

10) Haddii sarkaalka xisaabiyaha ah ee khasnada la kala diray sida ku cad farqada 9aad, uusan ahayn Xoghayaha Khasnada, Wasiirku ma kala diri doono kastanada haddii aysan wasaaradda gaarka

ah ee ka masuulka ah ku shaqaynta sanduuqa gaarka ahi aan lala tashan.

### *Qodobka 23aad*
### *Kayd Ku-tala-galka Dhacdooyinka lama Filaanka ah*

1) Waxa jiri doona kayd loogu talagalo dhacdooyinka lama filaanka ah ee imaada sanad miisaaniyadeedka gudahiisa oo lagu bixin doono hawlaha gurmadka dagdaga ah lagana bixin doono dhammaan lacagaha ay u soo qoondeeyeen Golaha Wakiiladu ujeedada kayd kaa.

2) Wasiirku haddii uu ku qanco in baahi degdeg ah oo kharash bixineed jirto kaas oo aan hore loo saadaalin isla markaana aan dib loo dhigi karin khatarna galin karta danaha guud, waxa uu samayn doonaa awood kharasheed uu ku qoran yahay kharashkaa lagu daboolaayo arrimaha lama filaanka ah waxaana u dirayaa xisaabiyaha guud, waxaana laga baxin doonaa horumarinta Keyda.

3) Haddii lacag horumaris ah la bixiyo sida ku qoran qodobka 21aad, farqadiisa (2aad), odoroska kaabista ee ujeedadu tahay badalaada qadarka la sii horumariyay waxa la keeni doonaa Golaha Wakiilada kal-fadhigooda ku soo xiga.

### *Qodobka 24aad*
### *Maalgalinta iyo Horumarinta Kaydka Guud ee Dakhliga*

1) Dhammaan lacagta ku jirta Kayda Dakhliga Guud waxa lagu maalgalin doonaa:

   (a) Baanka isaga oo codsanaya , ama
   (b) Shuruud ah inaanay ka badnayn muddo laba iyo tobon bilood ah ama;
   (c) Maalgalin uu ogolaaday sharci si loogu maalgaliyo kaydyada ammaano-haynta (trust) oo uu Wasiirkuna ansixiyo.

2) Iyada oo ay shardi tahay qaadashada daynta ee qodobkani uu hoos imaanayo, Wasiirku waa inuu, awood kharash oo uu saxeexay u gudbiyaa Xisaabiyaha Guud, waxaanu sii dayn karaa lacag horumaris ku meel gaadha ah oo laga saaro Kaydka Dakhliga Guud,

   (a) Laguna shubo Keydyada gaarka ah; ama
   (b) Saraakiisha dawladda, si loogu bixiyo kharashka lagu ansixiyey xeerka qoondaynta ama xeerka qoondaynta kabista ah ;
   (c) Lacagahaas horumariska ah waxaa dib loo bixin doonaa ka hor dhamaadka sanad miisaaniyadeedka la bixiyey.

3) Si looga fogaado shakiga, wixii maalgalin ah ama horumarin ah ee lagu sameeyay sida ku cad xeerkani ma noqon doonaan lacag la bixid ah oo laga saaro Kayda Dakhliga Guud.

### ***Qodobka 25aad***
### ***Dayn Siinta***

Hantidhawraha Guud waxa uu hadba waqti uu wasiirku ka codsado, soo saari doonaa dayn uu siiyo Dakhliga Guud ee (khasnada) oo uu siin doono Wasiirka:

(a) Qadarka ku baxaya sannad maaliyadeedkaasi oo ah kharash qaanuuni ah; iyo
(b) Qadarka ku baxaya adeegyada sannad maaliyadeedkaasi

(i) Iyada oo ay fasaxayaan Xeerka Qoondaynta ama xeerka qoondaynta ee kaabista ahi, ama;
(ii) Sida ku cad Qodobada 13aad iyo 24aad ee Xeerkan.

### *Qodobka 26aad*
### *Lacagaha Laga Saarayo Kayda Dakhliga Guud*

1) Wax lacag ah lagama saari karo Kaydka Dakhliga Guud iyada oo aan marka hore la helin awood kharasheed uu saxeexay Wasiirku loona diray xisaabiyaha Guud.

2) Wasiirku ma soo saari karo awood kharasheed ujeedadeedu tahay in la daboolo kharash haddii aysan jirin bixinta daynta oo uu soo saaray Hantidhawraha Guud iyo kharash kaas:-

(a) Oo Uu ogolaaday sannad maaliyadeedka ay la bixidaasi dhacayso:-

(i) Xeerka Qoondadu;
(ii) Xeerka Qoondada ee Kabista ah;

(iii) Awooda kharash lagu soo saaray Qodobka 13aad ee Xeerkani;

(b) Ah kharash qaanuuniya;

(c) Dib loogu bixiyo lacag khalad ku soo gashay keyda Dakhliga Guud ; ama

(d) Loogu talo galay in lagu bixiyo lacagta lagu codsaday wax horumaris ah, dib-u-celin ah, in la diido ama dib ula noqosho lagu sheegay xeerkani ama xeer kale oo kasta.

3) Wasiirku waxa uu hakin karaa, dib ula noqon karaa, xadidi karaa ama ku soo rogi karaa shuruudo awood kharash bixin kasta ama amar kale oo uu isagu soo saaray haddii Wasiirku ku qanco in talaabadaasi looga baahanyahay sabab la xidhiidha arrin maaliyadeed oo degdeg ah ama ay ku jirto danta guud.

## *Qodobka 27aad*
## *Awoodaha kharash ee Xisaabiyaha Guud*

1) Xisaabiyaha Guud waxa uu awood kharash oo uu saxeexay, ugu ogolaanayaa saraakiisha xisaabaadka in ay galaan kharash ilaa iyo xadka uu awood kharasheedkaasi u cayimo iyago istcimaalaya inta kuqoondaysan awood kharasheedkaas isla markaan waafaqsan shuruudaha lagu sheegay awood kharasheedka.

2) Xisaabiyaha Guud ma soo saari karo wax awood kharasha ah haddii qadarka guud ee ujeedada loo soo saaray aan lagu xusin awood kharasheedkii uu soo saaray Wasiirku iyada oo loo eegayo farqada (1aad) ee qodobka 24aad ee Xeerkan.

3) Awood kharasheedka uu soo saaray Xisaabiyaha Guud wuxuu noqon doonaa mid lagu xidho xadka, macluumaadka iyo shuruudaha uu go'aamiyo Wasiirku isaga oo adeegsanaya awoodaha uu Wasiirku ku siiyay farqada (3aad) ee qodobka 24aad ee Xeerkani.

4) Xisaabiyaha Guud ma bixin karo wax lacag ah ama ma aqbali karo wax kharash ah oo laga saaro xisaabaadkiisa, saraakiisha xisaabaadkuna ma samayn karaan wax lacag bixina haddii aanu u fasixin awood kharash in ay sidaasi yeelaan

## QAYBTA VIII AAD
## Amaahda, Damaanadaha iyo Deeqaha

### *Qodobka 28aad*
### *Awooda lacag Amaah ah lagu Ururin Karo*

1) Iyada oo loo eegayo qodobada Dastuurka, awooda lacag dayn ah lagu ururin karo, lagu soo saari karo, dammaanado ama lagu aqabli karo deeqo iyada oo laga wakiil yahay dawladda waxa kali ah oo iska lahaan doona Wasiirka. Qofna, haay'ad ka tirsan dawladda, ama Golayaasha Dawladdaha Hoose, ma qaadan karaan, ururin karaan wax dayn ah ama ma soo saari karaan wax dammaanado ah, ama ma qaadi karaan hawl kasta oo kale taas oo si toosan ama si dadbanba ay uga dhalan karto wax masuuliyad daro daynmeed ah oo ay dawladdu qaadato, haddii ayaanay ogolaansho hore ka haysan Wasiirka.

2) Amaahda waxa lagu ururin karaa iyada oo la adeegsanayo shuruudahii lagu galay daynta la waafajinaya shareecada , dib u bixinta ama si kalaba oo ay uu gorgortan ka gali karo Wasiirku laakiin, ujeedadu ay tahay oo kali ah:

   (a) Marka lagu bixinayo hoos u dhac miisaaniyadeed;
   (b) Marka dib loogu bixinayo daymo bislaaday;
   (c) Marka lacag qalaad lagu helayo;
   (d) Marka lagu maalgalinayo siyaasad maamul maaliyadeed iyo lacageed;
   (e) Marka la amaahinayo haay'ad loo ansixiyay; ama
   (f) Si kalaba loogu bixiyo kharash ay tahay sharciyan in la baxsho.

3) Marka laga reebo wixii daymo ah ee lagu ururiyay ujeedada Xubinta (b) iyo (d) ee farqada (2aad) ee qodobka 28aad ee xeerkan, macluumaadka iyo shuruudaha daymeed waxa la hor keeni doonaa Golaha Wakiilada mana shaqayn doonaan illaa ay ka ansixinayaan Golaha Wakiiladu iyaga oo qaraar ku soo saaaraya.

4) Wasiirku wuxuu sannad maaliyadeed kasta diyaarin doona nidaamka lagu maamulayo daymaha, waxaanu soo saari doonaa macluumaadka iyo shuruudaha wax amaah ah lagu gali karo iyo sidoo kale daymaha ay dawladdu balanqaadayso wakhti illaa wakhti.

***Qodobka 29aad***

***Lacagta Loo Amaahday in lagu baxsho Kaydka Dakhliga Guud***

1) Dhammaan lacagta la ururiyay sida ku cad Qodobka 28aad waxa lagu bixin doonaa Kaydka Dhakliga Guud waxana ay ahaan doontaa qayb ka mid ah kaydkaas habka lacagtaas loogu talogalay waxaany diyaar u ahaan doontaa wixii loogu talo galay.

2) Haddii dayn loo qaato ujeedo loo sameeyay keyd gaar ah sida ku cad farqada (3aad) ee qodobka 24aad ee Xeerkan, Wasiirku wuxuu amar uu saxeexay ku bixin karaa in lagu daro keydaasi ayna ka mid noqoto.

***Qodobka 30aad***
***Ururrsiga Daymaha***

1) Dayn waxa lagu ururin karaa:

   (a) Iyada oo la soo saarayo Sanadooyinka khasanadda dawladda (bills), Sendooyin (bonds), ama saami (stock) uu soo saarayo Wasiirku;
   (b) Si ala sidii kale ee Wasiirku u arko in aan laga fursanayn, oo ay ku jirto xisaabta casaanka ah ee isbabadalysa.

2) Daynta lagu qaatay sida ku cad Xarafka (a) ee farqada (1aad) ee qodobka 30aad ee xeerkan, waxa loo eegi doonaa shuruudaha ku xusan Jadwal 1aad ee Xeerkani.

***Qodobka 31aad***

***Dib u Bixinta, Bedelaada iyo Isku-darka Daymaha***

Wasiirku wuxuu, isaga oo raacaya macluumaadka iyo shuruudaha uu go'aamiyey, meelaha lagama maarmaanka ah, uu ansixiyo amaah bixiyuhu:

(a) Dib u bixin doonaa wax dayn ah oo ka horaysa xilligii la bixin lahaa dayntaas;
(b) In uu ku badalo dayn taasi dayn kasta oo kale; ama
(c) In uu isku daro laba ama wax ka badan oo daymo ah oo laga dhigo dayn cusub oo jirta.

***Qodobka 32aad***
***Kharashka Daymaha***

Dhammaan kharashka iyo hawsha ku baxda ururinta daynta iyo soo saarida ama maamulidda lacagta lagu ururiyay si waafaqsan Xarafka (a) ee farqada (1aad) ee qodobka 30aad ee xeerkan, waxa lagu dalici doonaa Keydka Dakhliga Guud, ama haddii Wasiirku uu amro, waxa laga bixin doonaa raasamaalka lacagta la ururiyay.

***Qodobka 33aad***
***Awooda Dammaanad Qaadka Daynta***

Haddii Wasiirku ku qanco in ay tahay danta guud, iyada oo ay u ansixiyeen Golaha Wakiiladu, wuxuu isaga oo dawladda ka wakiil ah damaanad qaadi karaa in dib loo baxsho lacagta raasamaalka ahayd oo ay la socoto bixinta faa'iido shareecada waafaqsani, iyo khidmadaha kale ee dayneed ee dayn kasta oo laga ururiyay dalka gudihiisa ama ka baxsan, isaga oo ku xidhaya habka iyo

shuruudaha uu u arko in ay ku habboon yihiin Dawladda soomaaliland;

(a) Golayaasha Dawladdaha Hoose;
(b) Golayaasha Gobolada ee dawladda;ama
(c) Wakaalad kasta oo kale ama haay'ad dawladeed taas oo Xubinta (b) ama (c) ee farqada (7aad) ee qodobka 47aad hoos imaanaysa.

### *Qodobka 34aad*
### *Ka Faa'iidaystuhu waa in uu bixiyaa dhammaan kharashka*

1) Haddii damaanad lagu bixiyo sida ku cad qodobka 33aad, golaha deegaanka ee dawlad hoose, golaha gobol, ama wakaalad kale ama haay'ad taas oo damanadaasi in ay ka faa'iidaysato loo bixiyay waxa ay dib ugu soo celin doontaa dawladda iyada oo raacaysa habka uu Wasiiku ku amro:

   (a) dhammaan lacagaha ay dawladu bixisay si ay u dhamaystirto damaanadaasi; iyo
   (b) Dhammaan kharashka ay dawladdu ku dhacday oo xidhiidh la leh damaanadaasi iyo, marka lagu daro, waxa kale oo ay siin doontaa dawladda faa'iido shareecada waafaqsan ama kharashka khidmada ee la xidhiidha maalgalintaas ama lacag taas ay dawladdu bixisay, kolba sida uu Wasiirku ku amro.

2) Dhamaan lacagaha lagu helay si waafaqsan farqada (1aad) ee qodobka 36aad ee xeerkan, waxa lagu dari doonaa Keydka Dakhliga Guud.

**Qodobka 35aad**
**Awoodda Qaadashada Daymaha**

1) Deeqaha ay dawladdu ka hesho dawladdaha shisheeye ama qof kasta oo kale waxa gudoomi doona Wasiirka isaga oo dawladda ka wakiila,

2) Qodobka 29aad ayaa loo adeegsan doonaa lacag kasta oo ay dawladdu ku hesho deeq ahaan.

**Qodobka 36aad**
**Qadarka ku taagan dayn ahaan ama Dammaanad ahaan ee laga Qaadayo Kaydka Dhakhliga Guud**

Wixii lacag ah ee laga qaadayo dawladda:

(a) Marka laga hadlayo dayn kasta ha ahaato mid dib loo bixinayo ama bixinta faa’iida shareecada waafaqsan;ama
(b) Qaab faa’iido shareecada waafaqsan ah ama qaab kale marka laga hadlayo sendooyinka(bonds), ama saamiyada lagu soo saaray si waafaqsan Qodobka 30aad ee jadwal kowaad ee Xeerkani;ama
(c) Marka laga hadlayo wax damaanad ah oo lagu bixiyay qodobka 29aad, oo lagu dalacayo ama laga bixinayo Kaydka Dhakhliga Guud iyada oo aysan jirin qoondo dheeraad ahi.

**Qodobka 37aad**
**Wasiirku waa in uu Cayimaa Sifaha Odoroska Sannad laha ah**

Wasiirku waa inuu, odoroska sannad laha ah ee dakhliga qaranka iyo kharashka loo soo gudbiyay Golaha

Wakiilada, ku cayimaa qadarka loo baahanyahay si loo hanto kharashka lagu bixinayo dhammaan daymaha ku xusan xeerkani, ha ahaadeen dib u bixin raasamaal ama bixin faa'iido shareecada waafaqsan ama khidmad kale oo lagu galay dayn sannad maaliyadeedkaasi taas oo la xidhiidha odoroskaas, iyo qadarka la rajaynayo in laga urursho daymo iyo deeqo sannad kaa gudihiisa.

### *Qodobka 38aad*
### *Igmashada Wasiirka*

Wasiirku isaga oo ku cadaynaya qoraal uu saxeexay, wuxuu sarkaal dawladeed u idman karaa:

(a) Shaqooyinka uu leeyahay sida ku cad Xeerkani ee la xidhiidha gorgortanka daynta, damaanada ama deeqaha; iyo

(b) Awooda ah in uu ku fuliyo isaga oo dawladda ka wakiila, heshiis ama qoraal kale oo la xidhiidha dayn ama damaanad qaad lagu ururiyay ama lagu bixiyay si waafaqsan Xeerkan.

## QAYBTA IX AAD
## Diyaarinta, Baadhista iyo Hubinta Xisaabaadka

### *Qodobka 39aad*
### *Xisaabaadka Sannad laha ah*

1) Dhamaadka sannad maaliyadeed kasta:

(a) Xisaabiyaha Guud waxa uu diyaarin doona una gudbin doona Hantidhawraha Guud iyo Wasiirka warbixin xisaabaadka lagu xusay Farqada (1aad) ee jadwal labaad ee Xeerkan,

muddo afar bilood ah; ama mudada kale ee intaas ka badan ee uu Golaha Wakiiladu u cayimo;

(b) Sarkaal kasta oo xisaabeed wuxuu muddo dhan saddex bilood gudohood ku diyaarin doonaa Xisaabaadka una gudbin doonaa Wasiirka iyo Hantidhawraha Guud, isaga oo nuqulna siinaya Xisaabiyaha Guud, marka la eegayo sannad maaliyadeed kaasi lagana hadlayo kharashka, dakhliga, khayraadka iyo lacagta uu sarkaalka xisaabaadku ka masuulka yahay, xisaabaadka iyo warbixinta lagu dajiyay farqada 2aad ee Jadwalka Labaad ee Xeerkan.

2) Wasiirku wuxuu sharci hoosaad waafaqsan, ujeedada xarafka (c) ee farqada (1aad) ee qodobka (18aad) wax kaga badali karaa Jadwalka Labaad ee Xeerkan.

3) Sarkaal kasta oo xisaabeed oo maamulaya kayd gaar ah iyo sarkaal kasta oo xisaabeed ama sarkaal kale oo dawladeed oo xukumaya wakaalad, amaano-haye (trust) ama maaliyad kale ama xisaab kale oo aan lagu xusin qodob kani, wuxuu diyaarin doonaa, saxeexi doonaa una gudbin doonaa Xisaabiyaha Guud, isaga oo nuqul siinaya Hantidhawraha Guud, Xisaabta wakaaladaasi, amaano-hayntaas (trust), kaydkaas ama xisaabtaas qaabka uu Xisaabiyaha Guud hadba waqti u sheego.

4) Dhammaan warbixin xisaabeedka lagu soo gudbiyay sida ku cad qodobkan waxa ay:

(a) Haddii uu amro xisaabiyaha guud waxa loo diyaarin doona xisaab waafaqsan heer xisaabaadka caalamiaga ah ee la aqoonsan yahay oo lagu dabaqayo wixii khuseeya dawladda iyadoon markasta la raacaayo tilmaan bixinta Xisaabiyaha guud .

(b) Sheegi doonaan haddii ay jiraan isbadal muuqda oo lagu sameeyay heer xisaabeedka ay aqoonsanyihiin xirfadlayaasha xisaabaadka ee Soomaaliland uuna ansixiyo Xisaabiyaha Guud loona adeegsado in lagu maamulo xisaabaadka dawladda waxana uu sheegi doonaa sababaha isbadalkaasi loo sameeyay;

(c) Waxaana salka uu u dhigi doonaa xisaabaadka ee la isticmaalay in lagu diyaarsho, lagu aqoonsado, wixii isbadel ah ee muuqda iyo sababaha keenay isbadalkaasi;

***Qodobka 40aad***
***Xisaab-xidh sanadeedka iyo Warbixinaha Kale***

1) Marka la helo xisaab-xidh sanadeedka lagu sheegay qodobka 39aad ee Xeerkani, Hantidhawraha Guud waxa uu ku amri karaa in la xisaabiyo lana baadho iyada oo la raacayo xeerarka Caalamiga ee xisaabaadka La aqbalay ee baadhista, waxanu uu, muddo ku siman lix bilood, ka dib dhamaashaha sannad Maaliyadeedka sannadkan la xidhiidha, xaqiijindonaa, iyadoo la ixtiraamayo Xisaab kastaba ,natiijada imtixaanida iyo baadhista.

2) Hantidhawraha Guud wuxuu muddada ku tilmaaman faqradda 40/1, diyaarin donaa warbixin marka uu baadho iyo xisaabaadka soo dhamaaday ee la helay .waxaanu warbixintaa u gudbin donaa golaha wakilada.

3) Hanti-dhawraha Guud waqti kasta, haddii ay ula muuqato amba u baahdo wuxuu u gudbin doonaa Shir-gudoonka Golaha Wakiilada iyo Wasiirka waxbixin ku sahabsan haddii ay ku yimaadaan arrimo lama filaan ahi awoodihiisa iyo shaqadiisa.

4) Sarkaalka xisaabaadka dawaldda ama sarkaal dawladdeed oo looga baahanyahay in uu diyaariyo xisaabaadka ku xusan qodobka 39aad,wuxuu diyarin doonaa oo waliba dadweynaha uu soo bandhigi doonaa warbixin sanadeedka ,isagoo raacaya habka faahfaahinta rasmiga ah ee dawladda oo tusaya:

   (a) Yoolka guud ee miisaaniyadda;
   (b) Nooca iyo ujeedooyinka barnaamij kasta oo muhiim ah oo ku jira miisaniyadda
   (c) Qiimaynta wax soosaar iyo samaynta ka soo horjeeda oo la barbar dhigaayo ujeedooyinka miisaaniyadda.
   (d) Soo koobista natiijooyinka maaliyadeed ee sannadkan ee wasaaradda, ama waaxda uu isaga/iyadu ay ka masuul yihiin oo loo diyaariyay qaab uu ansixiyay Xisaabiyaha Guud.

(e) Qorshaha Sannadka soo socda, sida ay u ansixiyeen Golaha Wakiiladu;

(f) Wax qabadka sannad laha, iyo

(g) Qorshayaasha laqaybiyay ee labada sanno ee soo socda ama mudada kale ee ka badan ee la go'aasaday.

### ***Qodobka 41aad***
### ***Shaqooyinka Hanti-dhawraha Guud***

1) Hantidhawraha Guud isaga oo ka wakiila Golaha Wakiilada,shaqadiisuna tahey baadhitaan, su'aalo weydiin , isla markaana hawshiisu tahey:

(a) Xisaabaha Guud;
(b) Dhammaan saraakiisha Xisaabaadka;iyo
(c) Dhammaan dadka lagu aaminay soo ururinta, qabashadda, haynta, soo saarida ama bixinta kharashka dawladda, ama helida, haynta, soo saarida, iibinta, wareejinta, ama, bakhaaro iyo hantida kale ee dawladeed

2) Hantidhawraha Guud iyo sarkaal kasta oo uu awood siiyay isagu si uu u guto waajib kasta oo ku xusan Xeerkan, waa inuu u gutaa waajibkaas si aan cabsi, eex ama baqdini ku jirin, qofna ama haay'adina ma soo faragalin karto ama ma samayn karto ama isuma dayi karto in uu sameeyo in uu si aan habboonayn sameeyo marka ay adeegsanayaan awoodahooda ama ay gudanayaan shaqooyinkooda

3) marka uu awoodihiisa adeegsanayo baadhiseed, iyo fatashaada xisaabaadka, Hantidhawraha

Guud, waa in uu marka la isku soo wada xooriyo in uu ku qancay shakhsi ahaan, oo ay waafaqsantaheyna arrimaha khaaska u ah xeer qeexa kasta.Waa innuu sidoo kale shakhsi ahaan u ku qanacsanyahey arrimahan hoos ku qoran:

(a) waa in ay waafaqsanyihiin dhammaan shuruudaha looga baahan yahey ee ku cad farqada (4aad) ee qodobka 39aad;

(b) Kharashka iyo Dakhliga lagu muujiyay xisaabeedka waa in loo maamuley si waafaqsan awoodaha saxda ah, gaar ahaana, in dhammaan kharashyadu waafaqsan yahey awoodihii kharash ee loo qoondeeyay.

(c) Arrimaha maaliyadeed ee haay'ada la baadhay iyo dhammaan dakhliga iyo lacagaha qaranka ee ay maamulaysay in lagu wado laguna fuliyo si nidaamsan oo ku habboon oo ay maamulayeen saraakiisha xisaabdka ama sarkaal kale oo dowladeed.

(d) Dhammaan wixii taxadir ah ee loo qaaday si loo illaaliyo Dakhliyada hayntooda, in si fiican loo isticmaalo khayraadka dawladda iyo hantidaba, iyo in wixii xeer-hoosaad ah, awaamiir ah iyo tilmaamo ah ee xidhiidh la leh iyaga si fiican loo illaaliyay

## *Qodobka 42aad*
## *Awoodaha Hanti-dhawraha Guud*

1) Marka uu gudanaayo shaqadiisa ee uu u kuurgalayo,ama badhayo xisaabaadka , Hantidhawrka Guud:

(a) Waxuu weydiisan karaa sarkaalka dawladeed in uu siiyo sharaxaad ama macluumaad kasta oo la xidhiidha shaqooyinkiisa, taas oo gacan ka geysaneysa in Hantidhawraha Guud guto hawlihiisa.

(b) Wuxuu awood siin karaa qof kasta oo u qalma in loo magacaabo Hantidhawre shirkadeed ama sarkaal kasta oo kale oo qaran, si uu iskugu dubarido waydiimaha, itixaamidda iyo baadhista isaga oo matalaya qof kaasina ama sarkaalkaa dawladda wuxuu war bixin siin doonaa, ka bilaabmata maalinta uu soo magacaabo Hantidhawraha Guud.

(c) Iyadoo aan la bixinayn wax khidmad ah, wuxuu samayn doonaa baadhis in lagu sameeyo hadhaagana laga qaato diwaanka, qoraal ama raadreeb yaala xafiiska kasta oo dawladdu leedahay;

(d) Wuxuu waydiin doonaa aragtida Xeer Illaaliyaha Guud oo qoraal ah su'aalaha la tacaluqa tafsiirka wixii Xeer ah ama sharci hoosaad ah ee khuseeya awoodaha Hantidhawraha Guud, ama fulinta awoodihiisa, Xeer Illaaliyaha Guudna wuxuu siin doonaa aragtidiisa oo qoraal ah muddo dhan todoba casho oo ka bilaabmata taariikhda uu helay codsiga.

2) Meelaha Hantidhawraha Guud fiiro gaar ah u yeelanayo:

(a) Lacag bixin lagu sameeyay iyada oo aan la haysan awood kharash; ama

(b) Isdhin kasta ama lumid ay keentay sahashi masuuliyadeed ama si xun wax maamulo; ama

(c) Ku guul daraysi si loo illaasho siyaasadda dhaqaalaha ama

(d) Wadar lacageed kasta oo ay ahayd in la xisaabiyo laakiin aaney dhicin oo ka maqan xisaabta dawladda.

Hantidhawraha Guud  marka la eego xaaladaha kharash bixinta ,diidmo luga isticmaaley Miisaaniyadda iyo xaalad kasta oo su'aalo ka dhalan karto oo arrimahan khuseeya, waxa uu warbixinta uu ka sameeyo u diri doonaa Shirgudoonka, iyaguna waxay u gudbin doonaan guddi hoosaadka Ilaalinta Hantida Qaranka ee Golaha Wakiiladda

3) Marka uu gudanayo waajibaadkiisa, Hantidhawraha Guud ama qof kasta oo awood siiyay qoraal ahaan, wuxuu awood u lahaan doonaa dhammaan diwaanada, raadreebyada, xashida lacag bixinta, qoraalada, lacagta cadaanka ah, shaanado, damaanado, bakhaaro, ama hantida kale ee dawladda ee uu gacanta ku hayo sarkaala kasta oo qaran, waxana uu baadhi doonaa, nuqulo ka samayn karaa hadhaana ka qaadan karaa qoraal kasta.

4) Marka uu adeegsanayo waajibaadkiisa, Hantidhawraha Guud ama sarkaal kasta oo uu si dhamaystiran qoraal ahaan ugu awood siiyay, waxa uu u fulin doonaa baadhistiisa si waafaqsan xeerarka caalami ahaan la isla qaatay ee baadhista.

5) Gudida Illaalinta Hantida Qaranku waxa ay ka fiirsan doonan:

(a) Warbixin kasta oo lagu sheegay sida ku cad farqada (2aad) waxana uu talo siin karaa Wasiirka ha ahaato aragtidiisa, in ay ku habboon tahay sarkaal kasta oo qaran in la ganaaxo iyada oo la raacayo Qodobka 42aad ee Xeerkani wixii khuseeya bixinta, dhamaystirnaan la'aanta, lumida ama wadarta ina khuseeya; ama

(b) In lagu qaaday xukun ka dhan ah sarkaalka dowladda, kaaso waafaqsan fal danbiyadeedkiisa ama

(c) In dul saar waafaqsan Qodobka 51aad ee Xeerkan, waxa lagu samayn doonaa xukun ka dhan ah oo edbin ahna oo lagu bilaabo oo ka dhana sarkaalkaasi ay hawshu khuseyso

### ***Qodobka 43aad***
### ***Xaqa uu Hanti-dhawraha Guud u leeyahay inuu Warbixinta u gudbiyo Wasiirka.***

Hantidhawraha Guud waxa u suurta gal ah, iyadoo ay ujeedadu tahay:

(a) Yareynta kharashyada aan wax soo saarka lahayn ee hantida qaranka;
(b) Kor u qaadida ururinta dakhliga dawladda; iyo
(c) Ka hortaga khasaaraha ee ay sababto dayacaadu, taxadardaradu, xatooyadu, daacad-daradu ama si kaleba lacagaha qaranku;

inuu Wakhti ka Waqti, uu Wasiirka talo-bixino uga sameeyo, sida uu marka Hanti-dhawraha Guud u arko inay lagama maarmaan u tahay in si habboon loo maamulo lacagta qaranka, oo ay ku jiraan dib u eegista xeerarka, tilmaamaha iyo awaamiir bixinaha ee lagu soo saaray si waafaqsan sharcigan.

### *Qodobka 44aad*
### *Baadhista in Lacagta loo Isticmaalay sida ugu Saxsan*

6) Hantidhawraha Guud, isaga oo ujeedadiisu tahay aasaasida dhaqaalaha, si habboon u maamulidda iyo dardar galinta hawl qabadka ee waax kasta taas oo qoondada ku jirta, ama xisaabaadka kaleba waxay u baahan yahiin sida ku cad Xeerkani, ama urur kale oo dawladeed ama gole deegaan oo dawlad hoose, wuxuu su'aalo waydiin doonaa, baadhi doonaa, kana soo warbixin doonaa marka uu u arko lagama maarmaan arrimaha hoos ku qoran:

(a) kharash garaynta Maaliyadda qaranka iyo isticmaalka khayraadka dawladda ee wasaaradaha, waaxyaha iyo qaybaha dawladda iyo dhammaan ururada dawliga ah iyo golayaasha dawladdaha hoose;

(b) Habka iyo samaynta shaqooyinka dadkan hoos ku qoran:

(iv) saraakiisha xisaabaadka;
(v) madaxda waaxayaha iyo qaybaha;

(vi) xoghayayaasha iyo saraakiisha maamul ee dhammaan waaxyaha;
(vii) ururada dawladda;
(viii) golayaasha deegaanka ee dawladdaha hoose;
(ix) dawladdaha hoose ee gobolada;
(x) hawl qabad kasta oo kale oo ay qabteen waaxyo, wakaaladaha dawligaa ah iyo golayaasha dawladda hoose ee lagu xusay qodobka 44aad ee xarafka (b)

1) Warbixinkastaa diyaariyeen Hantidhawraha Guud ee natiijo waa su'aalaha shaqo ee ay waydiiyaan cida ay khusayso shaqadoodu , xidhiidhada iyo baadhitaano hoos imanaya qaybta , waxa la hor dhigi doona Golaha Wakiilada taa soo loo diri doono Gudida Illaalinta Hantida Qaranka ee Golaha Wakiilada.

2) Qodobka 42aad ee Sharcigani wuxu waajibinaya qabashada baadhiitaannada, xidhiidhada iyo baadhitaanada ay sameeyeen Hantidhawraha Guud ee fulinta awoodihiisa shakhsi ahaan oo hoos timaad Qaybta Sharcigan.

## *Qodobka 45aad*
## *Igmashada Hawlaha*

Sarkaal dawladeed haddii u ogolaanshaha awoodeed ka haysto hantidhawraha guud, waxa uu qaban karaa waxkasta oo uu hantidhawraha guud qaban karo sida ku cad Xeerkan, marka laga reebo in uu cadeeyo una gudbiyo warbixin xisaabeed Golaha Wakiilada.

## QAYBTA X AAD

## Illaalinta Maaliyadda Wakaaladaha Dawladda, Iwm

### *Qodobka 46aad*
### *Xisaabaadka Wakaaladaha Dawladda IWM*

1) Iyadoo aan loo eegayn wax kasta oo ku lid ah xeer dhaqan gashan, wakaalad dawladeed waa inay muddo afar bilood, dhamaadka sanad maaliyeedkeeda, diyaarisa una gudbisa Wasiirka xisaab hanti dhawrsan o laxidhiidha hawlqabadkeeda sanad maaliyadeed.

2) Xisaabaad sanadeedka ku xusan farqada (1aad), waa in loo diyaariya si waafaqsan nidaamyada caalamiga ah ee uu ogol yahay xisaabaadka dawliga ah waa in la horgeeya Golaha Wakiilada Wasiirka muddo aan ka badnayn hal bil ka dib marka uu Wasiirku helo, marka laga reebo, haddii Golaha Wakiiladu aanay lahayn kal-fadhi, markaas oo warbixintaasi la horgaynayo Golaha wakiilada maalinta ugu horeysa ee kal-fadhiga ku xiga.

### *Qodobka 47aad*
### *Illaalinta Wakaaladaha Dawladda*

1) Iyada oo aan loo eegayn in ay lid ku tahay xeer kale oo dhaqan gala, xisaabaadka wakaalad dawladeed kasta waa inu hantidhawraa Hantidhawraha Guud.

2) Isagoo gudanaya waajibaadkiisa Qaybtan ku xusan, Hanti-dhawraha Guud;

(a) Wuxuu yeelan doonaa go'aan ka gaadhis iyo awoodo la mid ah kuwa Qodobka 42aad ee Xaarkani siinayo Hanti-dhawraha Guud, marka loo eego lacagaha, shaanbadaha (stamps), damaanadaha, kaydadka iyo hantida kale ee ay leedahay wakaalad dawladeed, Haddii lacagaha, shaanbadaha, damaanadaha, kaydka bakhaarka yaala, ama hantida kale ee Hay'ada dawladu ay noqdaan lacago dawladeed iyo hanti dawladeed sida ay u kala horeeyaan, isla markaana saraakiisha Wakaalada dawladu ay noqdaan Saraakiil Dawladeed oo ka tirsan shaqaalaha Dawlada, sidoo kale;

(b) wuxuu awood usiin karaa qof kasta oo u qalma in loo magacaabo hanti-dhawre shirkadeed, ama sarkaal kasta oo dawladeed, isaga oo ka wakiil ah Hanti-dhawraha Guud inuu kormeero, baadho ama hubiyo Diiwaanada iyo Xisaabaadka cidkasta oo Hanti-dhawraha Guud looga baahanyahay inuu baadhis ku sameeyo sida ku cad Qaybtan. Qofkaasi ama Sarkaalkaasi wuxuu baadhitaanka Hanti-dhawriseed ee uu samaynayo u fulin doonaa si waafaqsan mabaa'diida caalami ahaan la aqbali karo ee Baadhitaanka Hantiyeed, isla markaana wuxuu Hanti-dhawraha Guud ugu warbixinayaa habka uu u dejiyo Hanti-dhawraha Guud.

3) Hant-idhawraha Guud waxa uu diyaarinnaya warbixin ku saabsan baadhista xisaabaadka ee lagu xusay qodobkani waxaana uu u diri doonaa Wasiirka iyo wakaalada dawlada ee ay khuseyso:

4) Wakaaladaha dawladu. muddo dhan 21 maalimood gudohood ah waa inay;

(a) U gudbinayaan wasiirka u aragtidiisa warbixinta ee lagu soo gudbiyay farqada (3aad) ee qodobka 47aad ee xeerkan ; iyo

(b) Nuqul la cadeeyay u diraa oo ku saabsan waxay aragtidiisa Hantidhawraha Guud.

5) Wasiirku waxa uu muddo dhan laba iyo affartan casho (42 maalmood) ka dib marka uu helo warbixinta uu diyaariyay Hantidhawraha Guud sida ku cad farqada (2aad) ee isla qodobkan, waxa uu ku samayn doona warbixintaas, iyo wixii kale ee aragtidiisaa ee ay samayso wakaalad dawladeed sida ku cad farqada (2aad) ee isla qodobkan ee xeerkan, iyo wixii kale ee aragtidiisa ee uu sameeyo Wasiirku, ee la gaynaayo Golaha Wakiilada

6) Hanti-dhawraha Guud waxa uu ka qaadi doonaa khidmad wakaalad kasta oo dawladeed oo la baadhay ama laga soo warbixiyay oo ku xusan xeerkan, oo ah kharashkii lagu fuliyay baadhista iyo diyaarinta warbixinta khidmadaasina waxa bixin doona wakaalada dawlada ee ay khuseyso iyada oo lagu shubaayo Kaydkaa Dakhliga Guud

7) Qodobkani waxa kale oo uu khuseeya;

(a) Wakaalad dawladeed kasta;

(b) Maamul dawladeed kasta oo xeer lagu aasaasay, oo aysan ku jirin Golayaasha

Deegaanka, taas oo hesha tabarucaad , ama mid shaqo, taas oo xeerka ay ku aasaantay ama xeer la xidhiidh leh, uu ku soo rogayo ama uu abuurayo masuuliyad qaameed ku waajibta lacagta maalgalinta;

(c) Maamul dawladeed ka hesha sanad maaliyadeedkeeda in ka badan kala badh dakhligeeda ah lacagta dawladda;

(d) Maamul dawladeed kasta oo kale oo aan ahayn Golayaasha Deegaanka, Golaha Dawladaha Hoose ama Golaha Dawlad Goboleed ee uu hantidhawray Hantidhawrka Guud ee Qaranku isaga oo raacaya xeerka

## QAYBTA XI AAD

## <u>Qodobo Kala Duwan</u>

### *Qodobka 48aad*
### *Ka Tanaasulka Sheegashada iwm Qiime Tirista Lacagta iyo Alaabta Bakhaarada Dawladda*

1) Wasiirku waxa uu haddii qaraar ka soo baxay Golaha Wakiiladda oo u ogolaado sidaasi, isaga oo raacaya illaa iyo xadka lagu cayimay qaraar kaasi, ka tanaasuli karaa ama xawili karaa wax sheegasho ah isaga oo dawlada ka wakiil ah, ama wax adeeg ah oo dawladda loo qabtay waxanu qiime tiris ku samayn karaa khasaaraha ama hoos u dhaca ku timid lacag dawladeed iyo khayraad dawladdu leedahay.

2) Qaraarka lagu xusay qodobka, farqada (1aad) ee qodobkan, waxa lagu cayimi karaa qadarka ugu

badan ee loo ogolaaday qiime tiris kasta ama ka dayn kasta iyo isu gaynta guud ee loo ogolaaday in ay noqoto mid la tiray ama laga tanaasulay sanad maaliyadeed.

3) Wasiirku waxa uu, qoraal uu isaga uu saxeexay, u igman karaa sarkaal kasta awood kasta haddii Wasiirka loo ogolaaday in uu adeegsado qaraar ka soo baxay Golaha Wakiilada oo ku xusan qodobkan.

4) Dhammaan xisaabaadka uu ansixiyo wasiirku ee qodobkan hoos timaadaa waxa lagu dari doonaa xeerka qoondada ee kaabista ah oo la keeni doono Golaha Wakiilada si Loo Sharciyeyo qadarka qoondadaas.

5) Haddii mar u dhaco khasaare, tanaasul, cafis ama khasaare guud yimaado ama dib u celin, ama dheeraad laga tanaasulay ama dib loo celiyay qadarkaasi uu ogolaaday qaraar kaas ee lagu xusay isla qodobkan 48aad, farqadiisa (1aad), qadarka ku lugta leh waxa loo qaadan doonaa kharash dheeraad ah iyada oo loo eegayo Qodobka 12aad ee sharcigan.

## ***Qodobka 49aad***
## ***Xisaabaadka Bangiga***

Haa'yad kasta oo dawli ah Kama furan karto bangiga xisaab rasmiya ka hor intaanay ka helin ogolaansho Xisaabiyaha Guud iyada oo qoraal ah, si ay howshaasi u

socoto wax loo baahan yahay xeerar iyo hab, waqti ka waqti, uu go'aamiya Xisaabiyaha Guud.

### *Qodobka 50aad*
### *Danbiyada*

Qofku wuxuu galay danbi haddii qofkaasi:

(a) Isagoo aan bixin cudur daar macquula oo ogaysiin ah, uu ku guul daraysto in uu bixiyo waqtiga ay taagan tahay, wax macluumaad ah, oo uu siinayo Xoghayaha Khasnadda oo uu u baahanyahay si macquula sida ku cad qodobka 20aad, farqada (5aad) ee xeerkan.

(b) uu isaga oo aan haysan cudur daar macquula, uu ku guul daraysto wax warbixin ah oo Xoghayaha Khasnadu ama qof uu isagu awood siiyay ay si macquula uga baahan karaan sida ku cad farqada (5aad) ee Qodobka 20aad ee Xeerkani;

(c) isaga oo aan haysan cudur daar macquula uu ku guul daraysto in uu bixiyo ama si kas ah u carqaladeeya in uu helo walax kasta oo loo baahanyahay sida ku cad qodobka 20aad farqadiisa (5aad) ee Xeerkani;

(d) fura ama sababa in la furo xisaab baan oo dawladdu leedahay ama si rasmi ah loo isticmaali doono iyadoo aan fasax laga haysan Xisaabiyaha Guud

(e) ama si kalaba uga horyimaada qodobka 49aad marka laga hadlayo xisaab Bangi;

(f) iyada oo ay ka soo horjeedo farqada (2aad) ee qodobka 42aad, soo dhex gala ama ku sameeya saamayn aan habboonayn sarkaal kasta ama

shaqaale ka mid ah Hantidhawrka Guud ama qof uu isagu/iyadu u ogolaaday wax sharaxaad ah iyo warbixin ah taas oo Hantidhawraha Guud ama qofkaasiba uu u baahanyahay;

(g) isagoo aan haysan cudurdaar macquula ama si ku lid ah Xarafka (a), farqada (1aad) ee qodobka 42aad, ku guul daraysta in uu siiyo Hantidhawraha Guud, ama qof kasta oo uu awood siiyay Hantidhawra Guudi wax sharaxaada iyo warbixinta uu Hanti Dhawraha Guud ama qofkaasiba u baahan yahay;

(h) Isagoo aan haysan cudurdaar macquula, ku guul daraysta in uu bixiyo, ama si kas ah u xaniba in uu helo alaab kasta sida ay farayaan farqada (3aad) ee Qodobka 42aad ee Xeerkani.

### *Qodobka 51aad*
### *Ganaaxyada iyo Dulsaarada (Penalties and Surcharge)*

1) Wasiirku wuxuu, isaga oo ku soo saaraya qaraar, dhigi doonaa ciqaabaha ka yaala ciddii ku dhaqmi wayda Xeerkani ama xeernidaamiyaha laga dheegtay Xeerkan, isaga oo aan dhaafinayn labaatan buundo lacageed.

2) Haddii qof lagu helo in uu galay danbi ka mid ah danbiyada lagu taxay Qodobka 50aad ee Xeerkani ciqaabta ama ganaaxa ugu badan ee danbigani wuxuu noqon doonaa:

(a) Wixii ciqaaba een ka badnayn ganaax dhan labaatan buundo lacageed ama mudddo kasta

oo xadhig ah oo aan ka badnayn 3 sano ama labadaba.

(b) Ciqaaba ka sareysa haddii ay jirto danbi labaad ama ku xigay oo la galay;

(c) Haddii ay jirto xaalad danbi oo xidhiidhsan, ganaax dheeraad oo ka badnayn labaatan buundo lacageed maalin kasta oo gafkaasi socdo

3) Hadii:

(a) Khasaare ama dhiniin ku yimid lacag dawladeed ama lacag kale oo dhacdo taas oo la sii qadimay ama ahayd mid hoos imaanasay maamulka sarkaal dawladeed; ama

(b) Khasaare ama baaba' ama dhaawac ku dhacay hanti dadweyne ama hanti kale ay ku dhacdo iyada oo hantidaas ay ahayd mid uu hayey sarkaal dawladeed, iyada Wasiirkuna ku qanco marka uu si dhamaystiran u wareysto, in dayacaad ama dhaqan xumo sarkaalka dawladeed uu sababay ama uu ka qayb qaatay lumida ama dhiniinka;

(xi) qadarka khasaaraha ama dhimista ;

(xii) qiimaha hantida luntay ama burburtay;

(xiii) qiimaha badalaada ama dayac tirka dhaawaca hantidaas gaadhay;

Kolba sida ay xaaladu tahay, waxa ay noqon doontaa dayn ay leedahay dawladdu waxana lagaga soo kabankaraa sarkaalka isaga oo la saaro maxkamad

awood u leh, waxana laga jari karaa wixii mushahar ah ama qadar kasta oo kale oo ku leeyahay dawladda

4) Haddii dayacaadaasi ama anshax daradaasi uu sameeyay sarkaalka dawladdu oo aanu lahayn sababta kali ah ee khasaaraha, hoos u dhaca, dhaawaca ama baaba'a ka yimid hawl sida ku xusan farqada (3aad) ee qodobka 51aad ee xeerkan , qadarka laga heli karo sarkaalka dawladdu waxa lagu xakamayn karaa kaliya qiimaha lagu badalayo ama lagu dayac tirayo khasaaraha, hoos u dhaca, dhaawaca ama baaba'a taas oo Wasiirku u arko, ka dib marka uu si dhamays tiran u waraysto, in ay tahay mid cadaalad ah oo miisaaman, isaga oo tixgashay tabaruca uu sameeyey sarkaalkaas, khasaarahaas, hoos u dhacaas, dhaawacaas ama baaba'aas.

5) Qodobkani waxaa looga jeedaa sarkaal dawladeed waxaa ku jira qofka ahaan jiray sarkaal dawladeed.

### *Qodobka 52aad*
### *Waxka-Bedelka Jadwalka Labaad*

Wasiirku waxa uu wax ka badali karaa jadwalka labaad isaga oo ku soo saaraya qaraar Wasiir.

### *Qodobka 53aad*
### *Xeer-Nidaamiyayaal*

Wasiirku waxa uu ku soo saarayaa qaraar wasiir oo ah xeer nidaamiyayaal si sifiican loogu dhaqan galiyo ujeedada iyo hadafka Xeerkani.

### *Qodobka 54aad*
### *Dhaqan galka, Nasakhaada iyo kaydinta*

1) Xeerkan waxa uu dhaqan gali doonaa ka dib marka uu Madaxweynahu saxeexo;

2) Shuruud kasta, sharci kasta oo ka soo horjeeda Xeerkan waa la nasakhay.

3) Xeer nidaamin kasta oo lagu nasakhay isla qodobkan 54aad, farqada (1aad) , ee aan la jaan qaadayn xeerkan wuxuu ahaan doonaa mid dhaqankiisu jiraayo illaa iyo waqtiga ay nasakhaso xeer nidaameed cusub oo lagu soo saaray sida ku cad qodobada xeerkan, balse sinaba ugama dambayn karto hal sanno ka dib marka uu dhaqan galo Xeerkan.

### *Qodobka 55aad*
### *Qaraarada ku Meel Gaadhka ah*

1) wixii dayn ah ee ay ururisay dawladdu ee ku xusan xeer taas oo masuuliyad daymeed ay uga dhalanayso intaan uusan Xeerkan hirgalin, waxa loo qaadan doonaa in ay tahay lacag la urursshay iyada oo la adeegsanayo xeerkan iyada oo aan loo eegayn in qadarka dayntu ama waajib kasta oo kale oo ay fulisay dawladdu marka la eegayo daynta dheeraadka wixii xadidaad ah ee lagu soo

rogo Xeerkan ama xeer kasta oo kale oo xeerkan nasakho.

2) Dhammaan sendooyinka Khasnada Dawladda (bills), sendooyinka (bonds) iyo alaabta qiimaha leh (security) ee lagu soo saaray iyada oo la adeegsanayo xeer kale laguna darayo si dhakhso ah inta uusan xeerkani dhaqan gal noqon, waa ay sii socon doonaan in ay dhaqan gal ahaanto waxana ay noqon doontaa mid qabanaysa si isku mid ah iyo illaa iyo xad isku mid ah sidii oo xeerkani lagu soo saaray.

### *Qodobka 56aad*
### *Mudnaanta Xeerkan*

Xeerkan ayaa ka mudnaan doona dhammaan xeerarka kale ee jira xeer kasta oo xeerkan ku lid ahina waa la badalay illaa iyo xadka ay iska soo hor jeedaan.

### Qodobka 57aad
### Qoraalka Afka-soomaliga ah Ayaa Rasmi ah oo la raacayaa

Iyadoo ay tahay lagama maarmaan in la hubiyo hirgelin iyo tafsiir hagaagsan oo Xeerkan ay ku jiraan kelmado u gaar ah arrimaha maaliyadda oo si baahan loo isticmaalo, waxaa halkan lagu cadeeynayaa, iyadoo la xusayo Qodobka 6aad ee Distoorka, in nuqulka xeerkan ee af-Somaliga ahi rasmi yahay, maadaama Golaha Wakiiladu Xeerkan wax ka bedel iyo kaabis ku sameeyeen, isla markaana ay soo saareen nuqulkan Af-soomaaliga ku qoran oo keliya.

# JADWALADA

# JADWALKA KOOBAAD

## Shuruudaha Urursiga Daymaha

1) Shuruudahan soo socda waxa loo adeegsanaya amaah qadasho sida ku cad Qodobka 30aad ee Xeerkan:

(a) Sendooyinka Khasnada Dawladda (bills) iyo Sendooyinka (bonds) waxa lagu soo saari doonaa shuruudaha iyo macluumaadka ugu fiican ee ugu hagaagsan, ee ra'yi ahaan Wasiirka lagu heli karo;

(b) Sendooyinka Khasnada (bills) oo la soo saaray ma noqon karaan qaar bislaaday muddo ka dambaysa hal sanno ka dib taariikhda la soo saaray.

(c) Saamiyada waxa lagu soo saari doonaa iyada oo ah saami ku diwaan gashan macluumaadka iyo shuruudaha ugu wanaagsan kuwaas oo, sida ay la tahay Wasiirka, lagu heli karo laguna wareejin karo cadayn qoran oo wareejineed.

(d) Shahaado kasta oo saami oo si sharci ah loo soo saaray waxa ay cadayn marag ma doon ah u noqon doontaa ciwaanka qofka lagu xusay iyo saamiga ku xusanba;

(e) Saamigu waxa uu noqon doonaa mid dib loogu iibsan karo qiimihiisii taariikhda lagu xusay markii la soo saarayay, taariikhdaasi oo aan ka dambayn affartan sano oo ka bilaabmata taariikhda la soo saaray;

(f) Wasiirku waxa uu lahaan doonaa doorashada dib u iibsi saami gabi ahaan ama qayb ahaan, isaga oo sameynaya lacag la bixid ama si kalaba, waqti kasta oo ka horeysa taariikhda lagu xusay farqada (e), shuruudahaasi oo la cayimay taariikhda la soo saaray

(g) Taariikhda loo magacaabay dib u iibsiga saamiga ama qayb ka mid ahba, dhammaan faa'iidooyinka shareecadda waafaqsani ee lacagta raasamaalka ahi waa ay joogsan doontaa in ay korto bixin raasamaal ha la codsado ama yaan la codsane;

(h) Faa'iidada shareecada waafaqsan ee saamiga, iyo sendooyinka (bonds) haddii faa'iido shareecada waafaqsan laga bixinayo, waxa laga bixin doonaa sanad kiiba kala badh ama mudooyinka kale ee ka dheer ee uu Wasiirku amro.

(b) Wasiirku waxa uu hadba waqti soo saari doonaa Sendooyinka Khasnada Dawladda (bills) , sendooyinka (bonds) ama saamiyada, waxanu ku soo rogi doonaa shuruudo, la jaanqaadaya xeerkani dhammaantii ama mid ka mid ah arrimahan soo socda:

(a) Qiimaha lagu soo saari karo damaanad;

(b) Qiimaha damaanadaha lagu soo saari doono laguna wareejin doono;

(c) Xadiga faa'iidada Shareecada waafaqsan;

(d) Marka laga hadlayo sendooyinka(bonds), qadarka qiimaynta raasamaal taas oo ka dhalan karta lacagta raasamaalka ah;

(e) Taariikhda iyo goobaha dib u bixinta raasamaalka iyo bixinta faa'iidada shareecada waafaqsan;

(f) Marka laga hadlayo sendooyinka (bonds) oo bixinta qiimaha dheeraadka ah (premium) ama qiimaha lagu bixiyay halkii, ama marka loo geeyo faa'iidada shareecada waafaqsan, qaab sendooyinka (bonds) lagu dooran doono ama nooca bixinta qiimaha dheeraadka ah ama qiimaha;

(g) Isu badalka saamiga loo badalo shahaado qof leh iyo badalka, hadba sida ay shuruuduhu dhigayaan, loo badalo shahaadooyinkaasi saami;

(h) Isu badalka sendooyinka (bonds), marka ay lacag taaganyihiin, oo loo badalo saami, ama;

(i) Shuruud kasta oo uu u arko lagama maarmaan;.

(3) Wax xaqal xafiis ah (stamp duty) lagama bixin karo dulsaar kasta oo shahaado ama badalaad saami ah.

(4) Si looga gaashaanto shakiga, wixii faa'iido shareecada waafaqsan ah ee, sendooyinka (bonds) iyo saami ahi waxa loo qaadan doonaa in ay yihiin faa'iido shareecada waafaqsan Xeerka Cashuuraha Macaashal Macaashka (income tax), iyo qodobada xeerkaasi ee khuseeya ka goynta (reebista) cashuurta ayaa loo adeegsan doonaa dantaasi awgeed, haddii aan la dhaafin faa'iidadaasi shareecada waafaqsan ee cashuur ka jarista amar lagu soo saaray Xeerkaasi.

JADWALKA LABAAD

## Qodobada Lagu Maamulayo Gudbinta Warbixin Xisaabeedka

GARSOORAANKA GUUD EE QARANKA JSL

1) Warbixin ahaan maaliyadeed ee soo socta waxaa gudbinaya Xisaabiyaha Guud oo u gudbinaya Hantidhawrka Guud iyo Wasiirka:

   (a) Warbixin isu jirta oo sheegaysa maqaamka maaliyadeed hanti sheega (balance sheet) oo muujinasa isu darka hantida iyo qaamaha ee dhammaan lacagaha dawladda iyo haay'adaha kale ee gabi ahaanba laga maalgasho Kayda Dakhliga Guud.

   (b) Warbixin isku jirta oo sheegaysa hawlqabadka maaliyadeed (warbixinta dakhli iyo kharash) (statement of income and expenditure) oo muujinaysa isu darka dakhliga iyo kharashka ee dhammaan maaliyadda dawladda iyo haay'adaha kale ee gabi ahaanba laga maalgaliyo Kayda Dakhliga Guud.

   (c) Waxbixin isku jirta oo sheegaysa warbixinta lacagta sida helitaankeedu yahay (statement of cash flow) oo ku saabsan dhammaan lacagta dawladda iyo haay'adaha kale ee gabi ahaanba laga maalgaliyo Kayda Dakhliga Guud taas oo muujinaysa dakhliga, kharashka iyo maalgalinta sannadka.

   (d) Warbixinta Maqaamka Maaliyadeed (miisaanka xisaabta ee kama danbaysta ah) (Balance sheet) taas oo muujinaysa hantida iyo qaamaha ee Kayda Dakhliga Guud oo kali ah.

   (e) Warbixin sheegaysa hawl qabadka maaliyadeed (warbixinta dakhliga iyo kharashka) oo muujinaysa dakhliga iyo kharashka Kayda Dakhliga Guud oo kali ah;

   (f) Warbixinta qulqulka naqadka ee Keyda Dakhliga Guud taas oo kali ahaan muujinaysa dakhliga, kharashka lagu hawlgalayo, lagu maalgalinayo laguna bixinayo lacagta iyo hawl qabadka lacag bixineed ee sannad maaliyadeedkaasi.

   (g) Warbixinta siyaasadda xisaabaadka iyo Qoraalada Warbixin Maaliyadeedka.

(h) Warbixin qadarka ku taagan dhamaadka sannadka ee khusaya daynta dawladda.

(i) Warbixinta qadarka ay dawladdu damaanad qaaday dhamaadka sanad maaliyadeed kaasi, ee khuseeya xisaabaha baanka ee si deymin ah (bank overdraft), daymaha, iyo qaamaha dawladda.

(j) Warbixin sheegaysa dhammaan qaamaha aan lagu talogalin.

(k) Warbixin sheegaysa qadarka ku taagan dhamaadka sanadkaasi, ee khusaya daymaha, ay dawladdu soo saartay.

(l) Warbixinta maalgashiga ay dawladdu ku qaadatay dhamaadka sanadka oo muujinaya qiimihii asalku ahaa iyo qiimaha hadda.

(m) Warbixin kooban oo khasaaraha dawladda lacag ahaan iyo alaababa, ee la tirtiran iyo ka tanaasul sanad maaliyeedka iyo awood tirtirkaas ama tanaasul uu saxeexay sarkaal xisaabeed sida ku xusan farqada 2aad(k) ee jadwalkan.

(n) Warbixin kooban oo ku saabsan dakhli baaqday madaxa dakhli kasta (each revevenue head) oo ah dakhli baaqday oo uu saxeexay sarkaalkii xisaabtaas sida ku xusan farqada 2aad(i) ee jadwalkan.

(o) Warbixin ku saabsan balanqaadyo taagan oo alaabo iyo adeegyo in la bixiyo ahayd kharash madaxeed kasta qadarkaas oo raacsanyahay balanqaadyo uu saxeexay sarkaalkii xisaabtaas sida ku xusan farqadda 2(f) ee jadwalkan.

(p) Qoraal xisaabeed oo kooban oo ah alaabta bakhaarada iyo wixii qiimo leh khusaysa madax kharasheed kasta oo uu saxeexay sarkaal xisaabeedku.

(q) Warbixin kasta oo kale oo ah qaabka uu Golaha Wakiiladu uu hadba waqti dalbado.

(2) Xisaabaadkan soo socda, ee uu saxeexay sarkaalka xisaabaadka oo ah qaabka Xisaabiyaha Guud uu amri karo,

taas oo loo soo gudbin doono Xisaabiyaha Guud oo uu u soo gudbin doono sarkaalka xisaabeed.

(a) Warbixin Waxqabadka Maaliyadeed (warbixinta dakhli iyo kharash) (statement of receipt and Payments) ee sannad maaliyadeed kaas.

(b) Heerka Warbixinta maaliyadeed (miisaanka xisaabta Kama danbaysta ah) (balance sheet) ee sannad maaliyadeed kaas.

(c) Dhaqdhaqaaqa lacagta cadaanka ah ee Warbixinta maaliyadeed (cash flow statement) taas oo muujinaysa dakhliga iyo kharashka lagu hawl galayo, lagu maalgalinayo iyo hawl qabadka maaliyadeed ee sanad maaliyadeed kaas.

(d) Xisaab qoondada oo muujinaysa adeegyada lacagta lagu isticmaalay ee lagu dalbaday markii hore kharash ahaan, isugaynta lacagta si rasmi ah loo isticmaalay adeeg kasta, iyo xaalada codsi kasta oo kharash marka la barbar dhigo qadarka uu u qoondeeyay codsigaas kharash ahaan Golaha Wakiiladu.

(e) Warbixin koobsanaysa qadarka balanqaad lacageed ee ku taagan keenida badeecada iyo adeegyada dhamaadka sanad maaliyadeed kaas iyo warbixin kasta oo kale oo Xisaabiyaha Guud u baahdo.

(f) Warbixin ka kooban qadarka ku talagalka arrimaha lama filaanka ah ee qaameed ee dhamaadka sanad maaliyadeed kaas iyo warbixin kasta oo kale oo Xisaabiyaha Guud u baahdo.

(g) Warbixinta dakhliga la helay oo tusaysa qadarka ku jirta odoroska dakhli ee il kasta oo dakhli, qadarka si rasmi ah loo ururiyay oo ka kooban sharaxaada wixii is badal ah ee ku jira dakhliga rasmi ahaan loo ururiyay iyo qadarka lagu qiyaasay iyo warbixin kasta oo kale oo Xisaabiyaha Guud u baahdo.

(h) Warbixinta dakhliga lala daahay oo muujinaya qadarka ku taagan dhamaadka sanad maaliyadeedka oo ku saabsan il kasta oo dakhli, waxba kuma jiraan baa la soo gudbin doonaa haday ku habboon tahay.

(i) Warbixinta hantida oo wadata faahfaahinta iyo qiimayaasha dhammaan bakhaarada aan la qoondayn ee ku jira illaalintiisa dhamaadka sanad maaliyadeedka, oo ay la socdaan faahfaahinta iyo qiimayaasha qayb kasta oo ka mid ah hantida hoos timaada maamulka sarkaal xisaabeed sida Xisaabiyaha Guud uu hadba waqti go'aamiyo.

(j) Warbixinta khasaaraha ku saabsan lacagta dawladda iyo bakhaarada laga soo warbixiyay, la qiime tirtiray iyo sheegashada la iska dhaafay ee sanad maaliyadeed kaas iyo amarka qiime tirtirkaas iyo iska dhaafidaas hadba sida uu xisaabiyaha guud waqti go'aamiyo.

(k) Warbixin hawl qabadka bixinasa qayb kasta wax soo saarkeeda taas oo la ina siiyay sanadkaasi oo; barbar dhigaya hawl qabadka saadaashii hawl qabad ee ku jirtay odoroska la geeyay Golaha Wakiilada sida ku cad Xubinta (iii), xarafka (b) ee faqada (1aad) ee qodobka 8aad, oo sheegaya sifooyinka illaa iyo xadka shuruudahaasi wax qabad ee lagu sheegay odoroska marka lala xidhiidhinayo bixinta wax soo saar kaasi oo lagu qancay; iyo

(l) Warbixin kasta oo kale oo ah qaabka uu Xisaabiyaha Guud uu hadba waqti u baahdo

(m) Warbixin hawl qabadka bixinasa qayb kasta wax soo saarkeeda taas oo la ina siiyay sanadkaasi oo; barbar dhigaya hawl qabadka saadaashii hawl qabad ee ku jirtay odoroska la geeyay Golaha Wakiilada sida ku cad Xubinta (iii), xarafka (b) ee faqada (1aad) ee qodobka 8aad, oo sheegaya sifooyinka illaa iyo xadka shuruudahaasi wax qabad ee lagu sheegay odoroska marka lala xidhiidhinayo bixinta wax soo saar kaasi oo lagu qancay; iyo

(n) Warbixin kasta oo kale oo ah qaabka uu Xisaabiyaha Guud uu hadba waqti u baahdo.

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL**

**Baashe Maxamed Faarax**
**Gudoomiye ku-xigeenka 1aad ahna Ku-simaha Gudoomiyaha G/Wakiilada JSL.**